County of San Diego

## Wakaalada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Adeegyada Caafimaadka Dhimirka

# Buug-gacmeedka Macaamiisha Qorshaha Caafimaadka Dhimirka (MHP)

## Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah

**3255 Camino del Rio S,**

**San Diego, CA 92108**

Taariikhda Daabacaada: 2022[1]

LIVE WELL SAN DIEGO | COUNTY OF SAN DIEGO HHSA HEALTH AND HUMAN SERVICES AGENCY

[1] Buug-gacmeedka waa in la siiyaa marka koobaad ee macmiilku helaayo adeegyada.

## English Tagline

ATTENTION: If you need help in your language call (888) 724-7240 (TTY: 711). Aids and services for people with disabilities, like documents in braille and large print, are also available. Call (888) 724-7240 (TTY: 711). These services are free of charge.

## الشعار بالعربية (Arabic)

يُرجى الانتباه: إذا احتجت إلى المساعدة بلغتك، فاتصل بـ 724-7240 (888)
(TTY: 711)). تتوفر أيضًا المساعدات والخدمات للأشخاص ذوي الإعاقة، مثل المستندات المكتوبة بطريقة بريل
والخط الكبير. اتصل بـ 724-7240 (888)
(TTY: 711). هذه الخدمات مجانية.

## Հայերեն պիտակ (Armenian)

ՈՒՇԱԴՐՈՒԹՅՈՒՆ: Եթե Ձեզ օգնություն է հարկավոր Ձեր լեզվով, զանգահարեք (888) 724-7240 (TTY: 711)։ Կան նաև օժանդակ միջոցներ ու ծառայություններ հաշմանդամություն ունեցող անձանց համար, օրինակ` Բրայլի գրատիպով ու խոշորատառ տպագրված նյութեր։ Զանգահարեք
(888) 724-7240 (TTY: 711). Այդ ծառայություններն անվճար են։

## ឃ្លាសម្គាល់ជាភាសាខ្មែរ (Cambodian)

ចំណាំ៖ បើអ្នក ត្រូវ ការជំនួយ ជាភាសា របស់អ្នក សូម ទូរស័ព្ទទៅលេខ (888) 724-7240 (TTY: 711)។ ជំនួយ និង សេវាកម្ម សម្រាប់ ជនពិការ ដូចជាឯកសារសរសេរជាអក្សរផុស សម្រាប់ជនពិការភ្នែក ឬឯកសារសរសេរជាអក្សរពុម្ពធំ ក៏អាចរកបានផងដែរ។ ទូរស័ព្ទមកលេខ (888) 724-7240 (TTY: 711)។ សេវាកម្មទាំងនេះមិនគិតថ្លៃឡើយ។

## 简体中文标语 (Chinese)

请注意：如果您需要以您的母语提供帮助，请致电(888) 724-7240 (TTY: 711)。另外还提供针对残疾人士的帮助和服务，例如盲文和需要较大字体阅读，也是方便取用的。请致电(888) 724-7240 (TTY: 711)。这些服务都是免费的。

## مطلب به زبان فارسی (Farsi)

توجه: اگر می‌خواهید به زبان خود کمک دریافت کنید، با (TTY: 711) 724-7240 (888) تماس بگیرید. کمک‌ها و خدمات مخصوص افراد دارای معلولیت، مانند نسخه‌های خط بریل و چاپ با حروف بزرگ، نیز موجود است. با 1 با (TTY: 711) 724-7240 (888)1ماس بگیرید. تماس بگیرید. این خدمات رایگان ارائه می‌شوند.

**हिंदी टैगलाइन (Hindi)**
ध्यान दें: अगर आपको अपनी भाषा में सहायता की आवश्यकता है तो (888) 724-7240 (TTY: 711) पर कॉल करें। अशक्तता वाले लोगों के लिए सहायता और सेवाएं, जैसे ब्रेल और बड़े प्रिंट में भी दस्तावेज़ उपलब्ध हैं। (888) 724-7240 (TTY: 711) पर कॉल करें। ये सेवाएं नि: शुल्क हैं।

**Nge Lus Hmoob Cob (Hmong)**
CEEB TOOM: Yog koj xav tau kev pab txhais koj hom lus hu rau (888) 724-7240 (TTY: 711). Muaj cov kev pab txhawb thiab kev pab cuam rau cov neeg xiam oob qhab, xws li puav leej muaj ua cov ntawv su thiab luam tawm ua tus ntawv loj. Hu rau (888) 724-7240 (TTY: 711). Cov kev pab cuam no yog pab dawb xwb.

**日本語表記 (Japanese)**
注意日本語での対応が必要な場合は (888) 724-7240 (TTY: 711)へお電話ください。点字の資料や文字の拡大表示など、障がいをお持ちの方のためのサービスも用意しています。 (888) 724-7240 (TTY: 711)へお電話ください。これらのサービスは無料で提供しています。

**한국어 태그라인 (Korean)**
유의사항: 귀하의 언어로 도움을 받고 싶으시면 (888) 724-7240 (TTY: 711) 번으로 문의하십시오. 점자나 큰 활자로 된 문서와 같이 장애가 있는 분들을 위한 도움과 서비스도 이용 가능합니다. (888) 724-7240 (TTY: 711) 번으로 문의하십시오. 이러한 서비스는 무료로 제공됩니다.

**ແທກໄລພາສາລາວ (Laotian)**
ປະກາດ: ຖ້າທ່ານຕ້ອງການຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອໃນພາສາຂອງທ່ານໃຫ້ໂທຫາເບີ (888) 724-7240 (TTY: 711). ຍັງມີຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອແລະການບໍລິການສຳລັບຄົນພິການ
ເຊັ່ນເອກະສານທີ່ເປັນອັກສອນນູນແລະມີໂຕພິມໃຫຍ່ ໃຫ້ໂທຫາເບີ
(888) 724-7240 (TTY: 711). ການບໍລິການເຫຼົ່ານີ້ບໍ່ຕ້ອງເສຍຄ່າໃຊ້ຈ່າຍໃດໆ.

**Mien Tagline (Mien)**
LONGC HNYOUV JANGX LONGX OC: Beiv taux meih qiemx longc mienh tengx faan benx meih nyei waac nor douc waac daaih lorx taux (888) 724-7240 (TTY: 711). Liouh lorx jauv-louc tengx aengx caux nzie gong bun taux ninh mbuo wuaaic fangx mienh, beiv taux longc benx nzangc-pokc bun hluo mbiutc aengx caux aamz mborqv benx domh sou se mbenc nzoih bun longc. Douc waac daaih lorx (888) 724-7240 (TTY: 711). Naaiv deix nzie weih gong-bou jauv-louc se benx wang-henh tengx mv zuqc cuotv nyaanh oc.

**ਪੰਜਾਬੀ ਟੈਗਲਾਈਨ (Punjabi)**
ਧਿਆਨ ਦਿਓ: ਜੇ ਤੁਹਾਨੂੰ ਆਪਣੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਮਦਦ ਦੀ ਲੋੜ ਹੈ ਤਾਂ ਕਾਲ ਕਰੋ (888) 724-7240 (TTY: 711). ਅਪਾਹਜ ਲੋਕਾਂ ਲਈ ਸਹਾਇਤਾ ਅਤੇ ਸੇਵਾਵਾਂ, ਜਿਵੇਂ ਕਿ ਬ੍ਰੇਲ ਅਤੇ ਮੋਟੀ ਛਪਾਈ ਵਿੱਚ ਦਸਤਾਵੇਜ਼, ਵੀ ਉਪਲਬਧ ਹਨ| ਕਾਲ ਕਰੋ (888) 724-7240 (TTY: 711). ਇਹ ਸੇਵਾਵਾਂ ਮੁਫਤ ਹਨ|

**Русский слоган (Russian)**
ВНИМАНИЕ! Если вам нужна помощь на вашем родном языке, звоните по номеру (888) 724-7240 (линия TTY: 711). Также предоставляются средства и услуги для людей с ограниченными возможностями, например документы крупным шрифтом или шрифтом Брайля. Звоните по номеру (888) 724-7240 (линия TTY: 711). Такие услуги предоставляются бесплатно.

**Mensaje en español (Spanish)**
ATENCIÓN: si necesita ayuda en su idioma, llame al (888) 724-7240 (TTY: 711). También ofrecemos asistencia y servicios para personas con discapacidades, como documentos en braille y con letras grandes. Llame al (888) 724-7240 (TTY: 711). Estos servicios son gratuitos.

**Tagalog Tagline (Tagalog)**
ATENSIYON: Kung kailangan mo ng tulong sa iyong wika, tumawag sa (888) 724-7240 (TTY: 711). Mayroon ding mga tulong at serbisyo para sa mga taong may kapansanan,tulad ng mga dokumento sa braille at malaking print.  Tumawag sa (888) 724-7240 (TTY: 711). Libre ang mga serbisyong ito.

**แท็กไลน์ภาษาไทย (Thai)**
โปรดทราบ: หากคุณต้องการความช่วยเหลือเป็นภาษาของคุณ กรุณาโทรศัพท์ไปที่หมายเลข (888) 724-7240 (TTY: 711) นอกจากนี้ ยังพร้อมให้ความช่วยเหลือและบริการต่าง ๆ สำหรับบุคคลที่มีความพิการ เช่น เอกสารต่าง ๆ ที่เป็นอักษรเบรลล์และเอกสารที่พิมพ์ด้วยตัวอักษรขนาดใหญ่ กรุณาโทรศัพท์ไปที่หมายเลข (888) 724-7240 (TTY: 711) ไม่มีค่าใช้จ่ายสำหรับบริการเหล่านี้

**Примітка українською (Ukrainian)**
УВАГА! Якщо вам потрібна допомога вашою рідною мовою, телефонуйте на номер (888) 724-7240 (TTY: 711). Люди з обмеженими можливостями також можуть скористатися допоміжними засобами та послугами, наприклад, отримати документи, надруковані шрифтом Брайля та великим шрифтом. Телефонуйте на номер (888) 724-7240 (TTY: 711). Ці послуги безкоштовні.

**Khẩu hiệu tiếng Việt (Vietnamese)**
CHÚ Ý: Nếu quý vị cần trợ giúp bằng ngôn ngữ của mình, vui lòng gọi số (888) 724-7240 (TTY: 711). Chúng tôi cũng hỗ trợ và cung cấp các dịch vụ dành cho người khuyết tật, như tài liệu bằng chữ nổi Braille và chữ khổ lớn (chữ hoa). Vui lòng gọi số (888) 724-7240 (TTY: 711). Các dịch vụ này đều miễn phí.

## OGEYSIISKA TAKOOR LA'AANTA

Sharcigu waa ka soo horjeedaa takooridda. Ismaamulka San Diego wuxuu raacayaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee Gobalka iyo Federaalka. Ismaamulka San Diego sifo sharci daro ah uma takooraayo, ugama saaraayo dadka, ama ulama dhaqmaayo dadka si kaduwan dadka kale sabab la xariirta jinsiga, isirka, midabka, diinta, asalka, wadanka ay kasoo jeedaan, aqoonsiga qoomiyadooda, da'da, naafada dhimirka, naafada jidhka, xanuun caafimaad, xogta hide sidaha, xaalada guurka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama dookha galmada.

Ismaamulka San Diego wuxuu baxshaa:

- Kaalmooyinka iyo adeegyada bilaashka ay ku helayaan dadka naafada ah si looga caawiyo inay xariir wanaagsan sameeyaan. sida:
  - Turjumaanada dadka naafada ah oo xirfad leh
  - Xogta qoraalka ah ee ku qoran qaababka kale (farta waawayn, farta indhoolka, codka ama qaababka lagu geli karo elektarooniga)
- Waxay siiyaan adeegyada luuqada oo lacag la'aan ah dadka luuqadooda hooyo aysan ahayn Ingiriiska, sida:
  - Turjumaano xirfad leh
  - Macluumaadka kuqoran luuqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadaan, la xariir Laynka Helitaanka iyo Gurmadka Masiibada ee shaqeeya 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii adoo wacaaya (888) 724-7240. Ama, haddii aadan si wanaagsan wax u maqli karin ama u hadli karin, fadlan wac 711. Marka aad codsato, dukumiintigaan ayaad ku helaysaa farta indhoolka, far waawayn, cod ahaan, ama qaabab elektarooniga ah.

## SIDA LOO GUDBIYO CABASHO

Haddii aad aaminsan tahay in Ismaamulka San Diego uu ku fashilmay inuu ku siiyo adeegyadaan ama uu sifo sharci daro ah kuugu takooray qaab kale asagoo cuskanaaya sababo la xariira jinsi, isir, midab, diin, asal, wadanka aad kasoo jeedo, aqoonsiga kooxda qoomiyada, da'da, naadada dhimirka, naafada jirka, xanuun, xogta hide sidaha, xaalada guurka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama dookha galmada, waxaad u gudbin kartaa cabasho wakaaladaha xuuqda u dooda ee soo socda. Waxaad cabashada ku gudbin kartaa khadka taleefanka, qoraal ahaan, si toos ah, ama elektarooniga ahaan:

- Taleefanka:
    - Si lagaaga caawiyo gudbinta cabasho la xariirta **adeegyada guryaha la dagan yahay**, waxaad wici kartaa **Barnaamijka Qareennada Bukaanka ee Adeegga Qoysaska Yuhuuda ah (JFS)** ood ka wacayso 619-282-1134 ama 1-800-479-2233.
    - Si aad u hesho caawimaad ku aadan gudbinta cabasho la xariirta adeegyada bukaan socodka, **waxaad wici kartaa Xarunta U qareemida Waxbarashada iyo U doodista Caafimaadka Macaamiisha (CCHEA)** oo aad ka wacayso laynka bilaashka lagu waco (877) 734-3258 (TTY 1-800-735-2929).
    - Ama, haddii aadan si wanaagsan wax u maqli karin ama u hadli karin, fadlan wac 711.
- Qoraal ahaan: Buuxi foomka cabashada ama waraaq qor oo u dir:

**<u>Adeegyada Xarumaha Dadka la seexsho:</u>**

Jewish Family Service of San Diego

Joan & Irwin Jacobs Campus

Turk Family Center

Community Services Building

8804 & 8788 Balboa Avenue

San Diego, CA 92123

**<u>Adeegyada Bukaan Socodka:</u>**

Consumer Center for Health Education and Advocacy (CCHEA)

1764 San Diego Avenue, Suite 100

San Diego, CA 92110

- <u>Si toos ah ugu gee:</u> Booqo xafiiska dhakhtarkaaga ama xarunta dhakhtarka u qandaraaska ka haysta Ismaamulka San Diego una sheeg inaad doonayso inaad cabasho gudbiso.

- <u>Qaab elektarooniga ah:</u> Booqo webseedyada hoose:

**<u>Adeegyada Xarumaha Dadka la seexsho:</u>**

Adeegyada Qoyska Yuhuuda ah ee San Diego

https://www.jfssd.org/

**<u>Adeegyada Bukaan Socodka:</u>**

Xarunta U qareemida Waxbarashada iyo
U doodista Caafimaadka Macaamiisha (CCHEA)

https://www.lassd.org/mental-health-and-substance-abuse-patients-rights/

## <u>XAFIISKA XUQUUQAHA MADANIGA AH</u> – WAAXDA ADEEGYADA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE CALIFORNIA

Waxaad sidoo kale cabashada xuquuqda madaniga ah u gudbin kartaa Waaxda Adeegyada Daryeelka caafimaadka ee California, Xafiiska Xaquuqda Madaniga adoo ka wacaaya taleefanka, qoraal u diraaya, ama oonlaynka ugu diraaya:

- <u>Taleefanka</u>: Wac **916-440-7370**. Haddii aadan hadli karin ama maqalkaagu culus yahay, fadlan wac **711 (California State Relay)**.
- <u>Qoraal ahaan:</u> Buuxi foomka cabashada ama waraaq ahaan ugu dir:
  **Department of Health Care Services**
  **Office of Civil Rights**
  **P.O. Box 997413, MS 0009**
  **Sacramento, CA 95899-7413**

  Foomamka Cabashada ayaa laga heli karaa:
  https://www.dhcs.ca.gov/discrimination-grievance-procedures

- <u>Qaab elektarooniga ah:</u> Iimeel u dir CivilRights@dhcs.ca.gov.

## XAFIISKA XUQUUQAHA MADANIGA AH – WAAXDA ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO AADANAHA EE MARAYKANKA

Waxaad sidoo kale cabasho xuquuqaha madaniga u gudbin kartaa Waaxda Adeegyada Bani'aadamka iyo Caafimaadka ee Mareeykanka, Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah adoo ka wacaaya taleefanka, waraaq u diraaya, ama oonleenka kala xariiraaya:

- Taleefanka: Wac **1-800-368-1019**. Ama, haddii aadan si wanaagsan wax u maqli karin ama u hadli karin, fadlan wac
  **TTY/TDD 1-800-537-7697**.

- Qoraal ahaan: Buuxi foomka cabashada ama waraaq ahaan ugu dir:

  **U.S. Department of Health and Human Services**
  **200 Independence Avenue, SW**
  **Room 509F, HHH Building**
  **Washington, D.C. 20201**

- Foomamka Cabashada ayaa laga heli karaa http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.

- Qaab elektarooniga ah: Booqo Barta Cabashada Xafiiska Xaquuqda Madaniga ah oo ah https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf

## SHAXDA MAWDUUCYADA

LUUQADAHA IYO QAABABKA KALE ........ 11
MACLUUMAAD GUUD ........ 12
XOG KU SAABSAN BARNAAMIJKA MEDI-CAL ........ 16
SIDA LAGU OGAADO IN ADIGGA AMA QOF KALE OO AAD TAQAANO UU U BAAHAN YAHAY CAAWIMAAD ........ 21
HELITAANKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA EE GAARKA AH ........ 24
DHAKHTARKA QAYBTA A ........ 34
BAAXADA ADEEGYADA ........ 36
GO'AANKA DIIDMADA GUNNADA EE UU SOO SAARO CAYMISKAAGA CAAFIMAADKA DHIMIRKA ........ 46
HANAANKA XALINTA CAQABADAHA: GUDBINTA CABASHO AMA RACFAAN ........ 50
HANAANKA CABASHADA ........ 53
HANAANKA RACFAANKA (HEERKA CAADIGA AH IYO KAN BOOBSIISKA AH) ........ 56
HANAANKA DHAGEYSIGA GOBALKA ........ 62
DARDAARANKA HORE ........ 66
XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA MACMIILKA ........ 68

## LUUQADAHA IYO QAABABKA KALE

### Luuqadaha Kale

Waxaad heli kartaa Buug-gacmeedkaan Macmiilka (guud-gacmeedka) iyo agabka kale oo bilaash ah kuna qoran luuqado kale. Wac 1-888-724-7240. Wicitaanka taleefanku waa lacag la'aan.

### Qaababka Kale

Waxaad xogtaan si bilaash uga helaysaa qaababka kale ee kaalmaatiga ah, sida Farta indhoolka, farta waawayn ee cabirta 18, ama cod ahaan. Wac 1-888-724-7240. Wicitaanka taleefanku waa lacag la'aan.

### Adeegyada Turjumaanka

Qasab maaha inaad isticmaasho qof qoyskaaga kamid ah ama saaxiib si uu kuugu turjumo. Adeegyada turjumaanka luuqada, iyo dhaqanka oo bilaash ah ayaa la heli karaa 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii. Si aad u hesho buug-gacmeedkaan oo ku qoran luuqad kale ama si aad u hesho caawimaada turjumaan, luuqad, ama dhaqan, wac 1-888-724-7240. Wicitaanka taleefanku waa lacag la'aan.

## MACLUUMAAD GUUD

### Maxay Muhiim u Tahay inaan Akhriyo Buug-gacmeedkaan?

Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah (SMHS) ayay heli karana dhammaan macaamiisha Medi-Cal ee dhammaan goballada Ismaamulka San Diego. Buug-gacmeedkaan ayaad ka helaysaa marka aad codsato xafiiska dhakhtarkaaga waxaadna ka heli kartaa oonlaynka.

Buug-gacmeedkaan ayaa kuu sheegaaya sida aad ku helayso adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee Medi-Cal oo aad ku helayso caymiskaaga caafimaadka dhimirka ee degmada. Buug-gacmeedkaan wuxuu sharxayaa gunnooyinkaaga iyo sida aad ku helayso daryeel. Wuxuu sidoo kale ka jawaabayaa su'aalo badan.

Waxaad baran doontaa:

- Sida aad ku helayso adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah
- Noocyada dheefaha aad helayso
- Waxa aad samaynayso haddii aad qabto su'aal ama cilad
- Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga marka aad tahay macmiilka Medi-Cal

Haddii aadan akhrin buug-gacmeedkaan hadda, waa inaad haysataa buug-gacmeedka si aad u akhrido hadhoow. Buug-gacmeedkaan iyo agabka kale ee qoran ayaa lagu heli kara amidkood qaab elektaroonig ah oo aad uga helayso barta https://www.optumsandiego.com ama qaab daabacan oo aad uga helayso caymiska caafimaadka Dhimirka, si lacag la'aan ah. Ka wac caymiskaaga caafimaadka Dhimirka lambarka 1-888-724-7240 haddii aad doonayso nuqulka daabacan.

Adeegso buug-gacmeedkaan oo dheeraad ku ah xogta aad heshay markii aad iska diiwaan gelinaysay Medi-Cal.

**Ma u baahan Tahay in Buug-gacmeedkaan lagugu siiyo Luuqadaada ama Qaab Kale?**

Haddii aad ku hadasho luuqad aan ahayn Ingiriis, adeegyada turjumaanka hadalka oo bilaash ah ayaad heli kartaa. Laynka Helitaanka iyo Masiibada oo ah 1-888-724-7240. Caymiskaaga caafimaadka Dhimirka: ayaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, todoba maalmood asbuucii.

Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa caymiskaaga caafimaadka Dhimirka oo aad ka wacayso 1-888-724-7240 haddii aad doonayso in buug gacmeedkaan ama xogta kale ee qoraalka ah lagugu siiyo qaabab kale sida far waawayn, Farta Indhoolka, ama cod ahaan. Caymiskaaga caafimaadka Dhimirka ayaa ku caawin doona.

Haddii aad doonayso in buug gacmeedkaan ama xogta kale ee qoraalka ah lagugu siiyo luuqad aan ahayn Ingiriis, wac caymiskaaga caafimaadka dhimirka. Caymiskaaga caafimaadka Dhimirka ayaa kugu caawin doona luuqadaada hooyo ayagoo kaala hadlaaya taleefanka.

Xogtaan ayaa lagu heli karaa luuqadaha hoos ku qoran.

- Ingiriis
- Carabi
- Jayniis (Mandarin)
- Tagalog
- Korean
- Persian (Farsi iyo Dari)
- Soomaali
- Isbaanish
- Fiitnaamiis

**Muxuu Masuul ka yahay Caymiskayga Caafimaadka Dhimirka?**

Caymiskaaga caafimaadka Dhimirka ayaa masuul ka ah waxyaabaha soo socda:

- Xaqiijinta inaad buuxisay shuruudaha helitaanka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee ismaamulka ama shabakadeeda dhakhaatiirta.
- Inay samayso qiimayn ku aadan go'aaminta inaad u baahan tahay adeegyada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah.
- Inay ku siiyaan lambar aad bilaash ku wacayso oo lagaa qabanaayo 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii, kaasoo kuu sheegaaya sida aad adeegyo uga helayso caymiska caafimaadka dhimirka. 1-888-724-7240.
- Ka hawlgelinta dhakhaatiir ku filan aagaaga si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada daawaynta caafimaadka dhimirka oo uu daboolaayo caymiska caafimaadka dhimirka haddii aad u baahato.
- Inay kuu sheegaan ayna ku baraan adeegyada aad ka helayso caymiskaaga caafimaadka dhimirka.
- Inay adeegyada kugu siiyaan luuqadaada ama turjumaan (haddii loo baahdo) si bilaash ah ayna kuu sheegaan in adeegyadaan turjumaanka la heli karo.
- Inay ku siiyaan xog qoraan ah oo ku saabsan adeegyada aad helayso kuna qoran luuqado kale ama qaabab kale sida Farta Indhoolka ama Far waawayn. Waxaad la xariiri kartaa MHP ama waxaad booqan kartaa webseedka www.optumsandiego.com. Xogta ayaa lagu heli karaa luuqadaha soo socda: Ingiriis, Isbaanish, Tagalog, Fiyeednaamiis, Carabi, Persian (Farsi iyo Dari), Mandarin, Korean, iyo Soomaali.
- Inay ku siiyaan ogeysiis la xariira isbadel kasta oo wayn oo ku yimaada xogta lagu sheegay buug-gacmeedkaan ugu yaraan 30 maalmood kahor taariikhda loogu talagalay in isbadelku dhaqan galo. Isbadelka ayaa loo arkaa mid wayn marka uu koror ama hoos u dhac ku yimaado cadad ama noocyada adeegyada la heli karo, ama uu koror ama hoos u dhac ku yimaado tirada dhakhaatiirta shabakada, ama haddii uu sibadel kale yimaado kaasoo saamaynaaya dheefahaaga aad ka helayso caymiska caafimaadka dhimirka.

- Inay iskula dubaridaan daryeelkaaga caymisyada kale ama nidaamada adeegyada baxsha marka loo baahdo si loo fududeeyo isku socodka daryeelkaaga ayna hagto ku xirida macaamiisha adeegyada, asagoo xaqiijinaaya in yoolka isku xirka la gaaro, iyo in dhakhtarka cusub uu aqbalo daryeelka macmiilka.

## XOG KU SAABSAN BARNAAMIJKA MEDI-CAL

### Qofkee heli kara Medi-Cal?

Sababo badan ayaa loo adeegsadaa go'aaminta nooca caymiska caafimaadka ee aad ka heli karto Medi-Cal. Waxaa kamid ah:

- Lacagta aad hesho
- Da'daada
- Da'da carruur kasta oo aad daryeesho
- Haddii aad uur leedahay, indho la'dahay, ama aad naafo tahay
- Haddii aad leedahay Medicare

Waa inaad sidoo kale ku nooshahay California si aad ugu qalanto Medi-Cal, haddii aad isleedahay waxaad u qalantaa Medi-Cal, hoos ka baro sida loo codsado.

### Sidee ayaan u codsan Karaa Medi-Cal?

Waxaad codsan kartaa Medi-Cal xili kasta oo kamid ah sanadka. Waxaad xulan kartaa mid kamid ah qaababka soo socda si aad u codsato. Ciwaannada gaarka ah iyo laymanka aad wacayso ee dookhyo kasta ayaa laga heli karaa barta http://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Pages/CountyOffices.aspx.

- Boostada: Codso Medi-Cal adoo adeegsanaaya Codsi isku duuban, oo ku qoran af Ingiriis iyo luuqadaha kale aadna ka helayso https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/eligibility/Pages/SingleStreamApps.aspx. U dir codsiyada aad buuxisay xafiiska deegaankaaga. Ka fiiri ciwaannada xafiiska deegaankaaga webseedka oo ah http://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Pages/CountyOffices.aspx.

- Taleefanka**:** Si aad uga codsato taleefanka, wac xafiiska deegaankaaga oo aad ka helayso:

- 2-1-1
- Access oo aad ka wacayso 1-(866) 262-9881

- Si toos ah: Si aad toos ugu codsato, ka fiiri xafiiska deegaankaaga liiska ciwaannada maxaliga ah ee hoose. Halkaan, waxaad ka helaysaa caawimaad ku aadan buuxinta codsigaaga. Taas badelkeed, haddii aad dagan tahay wadan kale, ka fiiri webseedka lifaaqiisu kor ku yaalo.
    - Xarunta Adeegyada Bulshada - Fallbrook
    - Xarunta Adeegyada Bulshada – Ramona
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - Centre City
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - El Cajon
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - Lemon Grove
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - North Central
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - North Coastal
    - Xarunta Adeegyada Qoyska – Metro
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - North Inland
    - Xarunta Adeegyada Qoyska - Chula Vista
    - Xarunta Adeegyada Qoyska – Southeast
    - Live Well Center - National City

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad la xariiri kartaa Xarunta Wicitaanka ee Access:

- Taleefanka 1-866-262-9881
- Webka: www.accessbenefitsSD.com
- Iimeylka: pubassist.hhsa@sdcounty.ca.gov

- Oonlaynka: Ka codso oonlaynka barta www.benefitscal.com ama www.coveredca.com. Codsiyada waxaa si amaan ah toos loogu diraa xafiiska adeegyada bulshada ee deegaankaaga, maadaama Medi-Cal lagu baxsho heer degmo.

My Benefits CalWIN waa webseedkeena oo aad:

- ka bilaabi karto shaqada codsiga adoo buuxinaaya codsiga fudud ee oonlaynka ah
- kusoo diri karto nuqullada elektarooniga ah si loo xaqiijiyo
- aad u ogaato haddii aad u qalmi karto dheefaha CalFresh iyo/ama Medi-Cal.

Si aad u biloowdo codsiga oonlaynka ah, booqo www.mybenefitscalwin.org. Daawo muuqaal si aad u barato sida looga codsato webseedka MyBenefits CalWIN oo aad ka helayso YouTube.

http://www.coveredca.com/

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo codsashada, ama aad qabto su'aalo, waxaad la xariiri kartaa La taliyaha Diiwaan Gelinta (CEC) oo tababaran si bilaash ah. Wac **1-800-300-1506**, ama ka raadi CEC ka shaqeeya deegaankaaga barta https://apply.coveredca.com/hix/broker/search.

- Codsiyada lagusoo diro Boostada ayaa la codsan karaa adoo wacaaya:
  - Access oo aad ka wacayso 1-(866) -262-9881
  - 2-1-1

  Codsiyada la buuxsho iyo/ama xaqiijinada ayaa boostada loogu diri karaa ama la keeni karaa xafiiska deegaankaaga ee Xarunta Adeegyada Qoyska.

Haddii aad wali su'aalo ka qabto barnaamijka Medi-Cal, waxaad xog badan ka eegi kartaa http://www.dhcs.ca.gov/individuals/Pages/Steps-to-Medi-Cal.aspx.

**Waa maxay Adeegya?**

Adeegyada degdega ah waa adeegyada macaamiisha waajahaaya xaalad caafimaad oo degdeg ah, ayna ku jiraan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka dhimirka. Xaalad caafimaad oo degdeg ah ayaa leh astaamo aad u xun (ayna u badan tahay inuu ku jiro xanuun daran) kuwaasoo uuu qof caadi ah si macquul ah u filan karo inay dhici karaan waxyaabaha soo socda xili kasta:

- Caafimaadka qofka (ama caafimaadka ilmaha uurka ku jira) ay dhibaato wayn ku dhacayso
- Dhibaato wayn ay ku dhici karto shaqada jirka
- dhibaato wayn ay ku dhici karto xubin ama qayb kamid ah jidhka

Xaalad caafimaadka dhimirka ah oo daran ayaa dhici karta marka qofka caadiga ah uu aamisan yahay in qof:

- Uu khatar taagan ku yahay naftiisa ama ama qof kale sabab la xariirta xanuun caafimaadka Dhimirkaa ah ama xanuun caafimaadka dhimirka ah oo looga shakiyay.
- Uusan awoodin si degdeg ah inuu siiyo ama cuno cunto, ama adeegsado dharka ama hooyga sabab la xariirta cilad u muuqata dhibaato caafimaadka dhimirka ah.

Adeegyada degdega ah ayaa la siiyaa 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii macamaiisha Medi-Cal. Kahor intaan ogolaansho loogu baahan adeegyada xaaladaha degdega ah. Barnaamijka Medi-Cal ayaa dabooli doona qarashaadka xaaladaha degdega ah, marka xanuunku uu la xariiro xaalad caafimaadka ama caafimaadka dhimirka (dareenka ama dhimirka). Haddii aad ka diiwaan gashan tahay Medi-Cal, ma heli doontid dalabka biilka si aad u bixiso qarashka gelitaanka qolka xaalada degdega ah, xataa haddii ay dhacdo in aadan qabin xaalad degdeg ah. Haddii aad isleedahay waxaad waajahaysaa xaalad degdeg ah, wac **911** ama booqo isbitaal ama xarun kale si laguu caawiyo.

**Gaadiid Ma la Heli karaA?**

Gaadiidka aan ahayn kan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka iyo gaadiidka aan la xariirin caafimaadka ayay heli karaan macaamiisha Medi-Cal ee aan awoodin inay inay gaadiid iskood u helaan qabana baahi caafimaad oo ay helaan adeegyada ay Medi-Cal daboosho. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo gaadiidka, la xariir caymiska daryeelkaaga maaraysan si aad u hesho xog iyo caawimaad.

Haddii aad haysato Medi-Cal laakiin aadan ka diiwaan gashanayn daryeelka maaraysan, aadna u baahan tahay gaadiidka aan ahayn kan caafimaadka, waxaad la xariiri kartaa caymiska caafimaadka dhimirka ee degmadaada si laguu caawiyo. Marka aad la xariirto shirkada gaadiidka, waxay ku waydiin doonaan xog ku saabsan taariikhd aiyo waqtiga balantaada. Haddii aad u baahan tahay gaadiid aan ahayn kan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka, dhakhtarkaaga ayaa kuu qori kara gaadiidka aan ahayn kan xaaladaha degdega ah ee caafimaadka kuguna xiri kara shirkada gaadiidka si laguugu diyaarsho gaariga ku qaadi lahaa si uu kuu geeyo kaagana soo qaado goobaha balantaada.

**Yaan La xariirayaa Haddii aan Qabo Fikirka Dilista Naftayda?**

Haddii adiga ama qof aad taqaano dhibaato ku jiro, fadlan wac Laynka Tooska ah ee Gurmadka Qaran ee Ka Hortagga Is-Dilista oo ah **988** ama **1-800-273-TALK (8255)**. Dadka deegaanka ee doonaaya caawimaad la xariirta dhibaatada iyo inay helaan barnaamijyada caafimaadka dhimirka ee maxaliga ah, fadlan wac Laynka Helitaanka iyo Masiibada oo ah 1-888-724-7240.

**Xogta Gaarka ah ee Dheeriga ah ee Caymiska Caafimaadka Dhimirka**

Haddii aad u baahan tahay gaadiidka aan ahayn kan caafimaadka, liiska adeeg bixiyaasha gaad*idka aan ahayn kan caafimaadka ayaa laga heli karaa* [https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Documents/List-of-Approved-Nonmedical-Transportation-Providers.pdf](https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/Documents/List-of-Approved-Nonmedical-Transportation-Providers.pdf).

## SIDA LAGU OGAADO IN ADIGGA AMA QOF KALE OO AAD TAQAANO UU U BAAHAN YAHAY CAAWIMAAD

**Sidee ayaan ku ogaanayaa Marka aan u Baahan nahay Caawimaad?**

Dad badan ayaa waajahaaya waqtiyo adag noloshooda waxayna waajihi karaan dhibaatooyin caafimaadka dhimirka ah. Waxa ugu muhiimsan inaad xasuusnaato waa in aad caawimaad helayso. Haddii adiga ama xubin kamid qoyska uu u qalmo adeegyada Medi-Cal iyo caafimaadka Dhimirka, waa inaad wacdaa laynka adeegyada caymiskaaga caafimaadka dhimirka oo ah 1-888-724-7240. Caymiskaaga daryeelka Maaraysan ayaa sidoo kale kaa caawin kara la xariirida caymiskaaga caafimaadka dhimirka haddii ay aaminsan yihiin in adiga ama xubin qoyskaaga kamid ah u baahan yahay adeegyada caafimaadka dhimirka oo caymiska daryeelka maaraysan uusan dabooli karin. Caymiska caafimaadka Dhimirka ayaa kaa caawinaaya helitaanka dhakhtarka adeegyada aad u baahan karto.
Waa inaad wacdaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka haddii adiga ama qof qosykaaga ah uu qabo midkood ama ka badan astaamaha soo socda:

- Niyad jabsan yahay (ama dareemaayo rajo xumo, caawimaad la'aan, ama uu aad u murugsan yahay) ama dareemayso inaadan doonayn inaad noolaato
- Luminta xiisaha ku aadan nashaadaadka aad badanaa jeceshahay
- Miisaan dhac ama cayil wayn muddo kooban gudaheed
- Hurdo yari ama hurdo badni
- Dhaqdhaqaaqa jirka oo yaraada ama xad dhaaf ah
- Dareemida daal ku dhawaad maalin kasta
- Dareemida qiimo la'aan ama danbiilenimo xad dhaaf ah
- Dhibaato dhanka fakar, diirad saarida, iyo/ama go;aan gaarista ah
- Baahida hurdada oo yaraata (dareemida inaad nasatay keliya kadib markii aad huruday waxyar)
- Fikrado torobo ah oo kaa celinaaya hurdada
- Hadal boobsiis ama inaadan joojin karin hadalka

- Aaaminida in dad usoo baxeen inay ku qabtaan
- Maqlida codad iyo/ama dhawaaqyo aysan dadka kale maqlayn
- Arkida waxyaabo aysan dadka kale u jeedin
- Inaadan awoodin inaad aado shaqada ama dugsiga sabab la xariirta inaad dareemayso niyad jab (ama dareemida rajo xumo, caawin la'aan, ama murug saa'id ah)
- Inaadan muddo dheer daryeelida nadaafadaada (nadaafada)
- Dhibaato kaa haysata fahanka iyo xariir la samaynta dadka
- Ka bixida ama fogaanshaha dadka
- Boohin joogto ah oo bilaa sabab ah
- Xanaaq joogto ah iyo buuq bilaa sabab ah
- Isbadellada dareenka ee degdeg ah oo daran
- Dareemida walaac ama cabsi mar kasta
- Lahaanshaha waxa dadka kale u arkaan habdhaqan aan la aqoon ama qariban kaasoo ka baxsan dabeecada lagu yaqaanay qofka

**Sidee ayaan ku ogaanayaa Marka Cunugaygu u Baahan yahay Caawimaad?**

Waxaad la xariiri kartaa laynka helitaanka adeegyada ee caymiskaaga caafimaadka dhimirka oo aad ka wacayso 1-888-724-7240 ama qorshaha daryeelka maaraysan si ay baaritaan iyo qiimayn ugu sameeyaan cunugaaga ama kuraygaaga haddii aad isleedahay wuxuu leeyahay wax kamid ah astaamaha xanuun caafimaadka dhimirka. Haddii cunugaaga ama kuraygaagu u qalmo Medi-Cal uuna baaritaanka caymiska caafimaadka dhimirku muujiyo in adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee uu caymiska caafimaadka dhimirku daboolo loo baahan yahay, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa u diyaarin doona cunugaaga ama kuraygaaga helitaanka adeegyada. Caymiskaaga daryeelka Maaraysan ayaa sidoo kale kaa caawin kara la xariirida caymiskaaga caafimaadka dhimirka haddii ay aaminsan yihiin in cunugaaga ama kuraygaagu u baahan yahay adeegyada caafimaadka dhimirka oo caymiska daryeelka

maaraysan uusan dabooli karin. Waxaa sidoo kale jira adeegyo ay heli karaan waalidiinta ay xad dhaaf ku noqotay shaqada waalidnimada ama qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka.

Liiska soo socda ayaa kaa caawin kara qiimaynta haddii cunugaagu u baahan yahay caawimaad, sida adeegyada caafimaadka Dhimirka. Haddii wax ka badan hal astaan ay jirto ama sii jirto muddo dheer, waxay muujin kartaa dhibaato daran oo u baahan caawimaad xirfadeed. Halkaan waxaad ka helaysaa qaar kamid ah astaamaha aad eegayso:

- Dhibaato badan oo la xariira diirad saarida ama wax ku sugnaanta, inay abuurayaan khatar jireed ama ay sababayaan dhibaatooyinka dugsiga
- Walwal ama cabsi daran oo caqabad ku noqonaaya qabashada shaqooyinkooda maalinlaha ah
- Cabsi degdeg ah oo ka tan badata oo bilaa sabab ah, oo marar qaar wadata wadna garaac ama neeftuur
- Uu dareemaayo murug ama uu ka fogaanaayo dadka kale muddo labo asbuuc ah ama ka badan, taasoo u keenaysa dhibaatooyin dhanka shaqooyinka maalinlaha ah
- Isbadellada dareenka oo daran oo keenaaya dhibaatooyin dhanka xariirada ah
- Isbadello degdeg ah oo ku dhacaaya habdhaqanka
- Diidista cuntada, mataga, ama adeegsiga caanaha oo keenaysa miisana dhac
- Adeegsiga joogtada ah ee khamriga ama daroogada
- Habdhaqan xun, oo aan la xakamayn karin kaasoo waxyeelo u gaysan kara naftiisa ama dadka kale
- Qorsheyaal ama iskudayo dhab ah oo uu ku doonaayo inuu waxyeelo isku gaysto ama isdilo
- Dagaalka joogtada ah, ama adeegsiga hubka, ama qorshe adag oo uu waxyeelo ugu gaysanaayo dadka kale

## HELITAANKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA EE GAARKA AH

**Waa maxay Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?**

Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah waa adeegyada dadka qaba xanuunka caafimaadka dhimirka ama dhibaatooyinka dareenka oo uusan dkhatrarka caadiga ah dawayn karin. Xanuunadaan ama dhibaatooyinkaan ayaa daran ilaa heer ay qofka ka hor istaagaan fulinta hawlaha maalin kasta ee noloshiisa.
Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah Waxaa kamid ah:

- Adeega Caafimaadka Dhimirka
- Adeegyada taageerada dawada
- Maaraynta Kiiska gaarka ah
- Adeegyada caawimaada masiibada
- Adeegyada dejinta masiibada
- Adeegyada xarumaha daawaynta ee la seexsho dadka waawayn
- Adeegyada xarumaha daawaynta la seexsho dadka dhibaatada ku jira
- Adeegyada adag ee daawaynta maalintii
- Baxnaaninta maalintii
- Adeegyada isbitaalka ee bukaan jiifka caafimaadka dhimirka
- Adeegyada xarunta caafimaadka dhimirka
- Adeegyada taageerada dadka isku xaalada ah (oo ay keliya heli karaan dadka waawayn ee deegaannada qaar, laakiin carruurta ayaa u qalmi kara adeegga oo lagu baxsho Baaritaanka, Helida Cudurka, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah ayadoo aan laga eegayn degmada ay dagan yihiin)

Marka lagasoo tago adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee kor ku qoran, macaamiisha kayar 21 sano jir ayaa heli kara adeegyada dheeriga ah ee caafimaadka dhimirka ee lagu baxsho dheefta Baaritaanka, Helida Cudurka, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah. Adeegyadaas waxaa ku jira:

- Adeegyada adag ee lagu baxsho guriga
- Isku dubaridka daryeelka adag
- Adeegyada baxnaaninta habdhaqanka
- Daryeelka carruurta ee baxnaaninta ah

Haddii aad doonayso inaad xog badan ka ogaato mid kasta oo kamid ah adeegyadaan caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah oo aad heli karto, ka fiiri qaybta "Scope of Services (Baaxada Adeegyada)" ee buug-gacmeedkaan.

**Sidee ayaan ku helayaa Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?**

Haddii aad aaminsan tahay inaad u baahan tahay adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, waxaad wici kartaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka kadibna waydiiso balan aad ku helayso baaritaan iyo qiimayn horudhac ah. Waxaad wici kartaa lambarka taleefanka lacag la'aanta ah ee degmadaada. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inay qiimaynta adeegyada caafimaadka dhimirka kugu sameeyaan qorshahaaga daryeelka maaraysan haddii aad tahay macmiil. Haddii caymiska daryeelka maaraysan uu go'aansho inaad buuxisay shuruudaha helitanaka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, qorshaha daryeelka Maaraysan ayaa kaa caawin doona gaarista helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka oo aad ku helayso caymiska caafimaadka dhimirka. Ma jirto albaab ay khalad tahay inaad ku hesho caafimaadka dhimirka. Waxaad xataa awoodi kartaa inaad adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee guud ka hesho Caymiskaaga Daryeelka Maaraysan ee Medi-Cal kaasoo dheeri ku ah adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Waxaad adeegyadaan ka helaysaa dhakhtarkaaga caafimaadka dhimirka haddii dhakhtarkaagu go'aansho in adeegyadu ay caafimaad ahaan muhiim kuu yihiin iyo inta adeegyadaas ay yihiin kuwo diyaarsan aysana ahayn kuwo aad labo jeer helayso.

Waxaa sidoo kale laguu gudbin karaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka si aad u hesho adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah oo uu kugusoo xiraayo qof kale

ama urur kale, uuna ku jiro dhakhtarkaaga, dugsiga, ama xubin qoyskaaga ah, waalidka, qorshaha daryeelkaaga maaraysan ee Medi-Cal, ama wakaaladaha kale ee gobalka. Caadiyan, dhakhtarkaaga ama qorshaha daryeelka maaraysan ee Medi-Cal ayaa u baahan doona ogolaanshahaaga ama kan waalidkaaga ama daryeelaka ilmaha, si ay toos kuugu gudbiyaan caymiska caafimaadka dhimirka, ilaa in ay xaalad degdeg ah jirto maahee. Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaan diidi karin codsiga samaynta baaritaanka hore si loo go'aansho inaad buuxinayso shuruudaha helista adeegyada caymiska caafimaadka dhimirku baxsho.

Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah waxaa bixin kara caymiska caafimaadka dhimirka (degmada) ama adeeg bixiyaasha kale ee caymiska caafimaadka dhimirku qandaraaska u siiyo (sida rugaha caafimaadka, xarumaha daawaynta, ururada bulshada, ama adeeg bixiyaasha gaarka ah).

**Xagee ayaan Ka helayaa Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?**

Waxaad adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ka helaysaa degmada aad dagan tahay, ama banaanka degmadaada haddii loo baahdo. Waxaa laguu gudbin karaa adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah adoo wacaaya Laynka Helitaanka iyo Masiibada oo ah 1-888-724-7240. Laynkaan ayaa la heli karaa 7 maalmood asbuucii, 24 saac maalintii. Degmo kasta waxay leedahay adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee carruurta, dhalinta, dadka waawayn, iyo waayeelka. Haddii aad ka yar tahay 21 sano, Waxaad u qalantaa caymiska dheeriga ah iyo gunnooyinka lagu baxsho Baaritaanka, Helista Xanuunka, iyo Daawaynta Caruurta ee Goos-gooska ah.

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ama adeeg bixiyaha ayaa go'aamin doona haddii aad buuxisay shardiga helitaanka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Haddii aad u qalanto, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kugu xiri doona si aad u hesho qiimayn. Haddii aadan buuxin shuruudaha helitaanka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, waxaa laguu gudbin doonaa qorshaha daryeelka maaraysan ee Medi-Cal ama adeeg bixiye lacag la'aan ah kaasoo go'aamin doona in aad u baahan tahay adeegyada caafimaadka dhimirka ee aan gaarka ahayn. Haddii caymiskaaga caafimaadka dhimirka ama dhakhtarka oo masuul ka ah caymiskaaga caafimaadka dhimirka uu diido, xadido, yareeyo, dib u dhigo, ama joojiyo adeegyada aad doonayso ama aad aamisan tahay inaad xaq u leedahay inaad hesho, waxaad xaq u leedahay in laguu soo diro Ogeysiis qoraal ah (oo loo yaqaano "Ogeysiiska Go'aaminta Gunnada Daran") oo aad ka helayso caymiska caafimaadka dhimirka kasoo kuu sheegaaya sababaha diidmada, iyo xuquuqdaada soo gudbinta racfaan iyo/ama Dhageysiga Gobalka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad diido go'aanka adoo codsanaaya racdaan. Waxaad ka heli kartaa xog dheeraad ah qaybta hoose taasoo qusaysa xuquuqdaada Ogeysiiska iyo waxa aad samayn karto haddii aad diido go'aanka caymiskaaga caafimaadka dhimirka.

Caymiskaaga caafimaadka Dhimirka ayaa kaa caawinaaya helitaanka dhakhtar kaasoo ku siin kara daryeelka aad u baahan tahay. Qorshaha caymiska caafimaadku waa inuu kugu xiraa dhakhtarka ugu dhow gurigaaga, ama heerarka waqtiga ama badka ee u degsan kaasoo buuxinaaya baahiyahaaga.

**Goorma ayaan helayaa Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?**

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka waa inuu buuxshaa xeerarka waqtiga balanta ee gobalka marka uu mudaynaayo balantaada si aad u hesho adeegyada uu baxsho caymiska caafimaadka dhimirka. Caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu ku siiyaa balan:

- 10 maalmood gudahood kadib marka aad dirto codsigaaga aan degdega ahayn si laguugu bilaabo adeegyada uu daboolo caymiska caafimaadka dhimirka;
- 48 saac gudahood haddii aad codsatay adeegyada xanuun degdeg ah;
- 15 maalmood gudahood kadib marka aad dirto codsigaaga aan degdega ahayn si aad u hesho balanta dhakhtarka dhimirka; iyo,
- 10 maalmood gudahood laga bilaabo balantii koobaad ee adeegyada xaaladaha taagan.

Hase yeeshee, waqtiyadaan sugitaanka ayaa intaas ka badan kara haddii dhakhtarkaagu uu go'aansho in waqtiga sugitanaka oo intaas ka dheer uu haboon yahay aysan dhibaato ka imaanayn.

**Yaa go'aaminaaya Adeegyada Aan Helaayo?**

Adiga, dhakhtarkaaga, iyo caymiska caafimaadka dhimirka ayaa dhammaan door ku leh go'aaminta noocyada adeegyada aad u baahan tahay inaad ka hesho caymiska caafimaadka dhimirka. Xirfadle caafimaadka dhimirka ah ayaa kula hadli doona kaana caawin doona go'aaminta nooca adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee kugu haboon ayadoo laga eegaayo baahiyahaaga.

Uma baahnid inaad ogaato inaad qabto cilado xanuunka dhimirka ah ama xanuun caafimaadka dhimirka ah oo gaar ah si aad u codsato caawimaad. Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa samayn doona qiimaynta xanuunkaaga. Dhakhtarka ayaa qiimayn doona in aad qabto iyo in kale xanuun dhimirka ah oo saamayn xun ku leh nolol maalmeedkaaga ama haddii aad qabto xanuunka dhimirka ama lagaaga shakiyay xanuunka dhimirka oo saamayn xun ku reebi kara noloshaada haddii aan lagaa daawayn. Waxaad awoodi doontaa inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay inta dhakhtarkaagu samaynaayo qiimayntaan. Uma baahnid inaad

qabto cilado xanuunka dhimirka ah ama xanuun caafimaadka dhimirka ah oo gaar ah si aad u esho adeegyada inta lagu jiro mudada qiimaynta.

Haddii aad ka yar tahay 21, waxaad sidoo kale awoodi kartaa inaad hesho adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah haddii aad qabto xanuun dhimirka ah oo ka dhashay dhacdo xun, soo marida nidaamyada sharciga carruurta, nidaamka maxkamadaha ilmaha, ama aadan haysan hooy. Waxaa intaas dheer, haddii aad ka yar tahay 21, caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu ku siiyaa adeegyada caafimaadka ahaan muhiimka ah si loo saxo ama lagaaga caawiyo xanuunka dhimirka. Adeegyada joogtaynaaya, taageeraaya, kor u qaadaaya, ama dejinaaya xaalada xanuunka dhimirka ayaa loo arkaa kuwo caafimaad ahaan muhiim ah.

Adeegyada qaar ayaa u baahan kara ogolaansho hore oo uu baxsho caymiska caafimaadka dhimirka. Caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu adeegsadaa xirfadle taqasus u leh si uu u dib u eegis ugu sameeyo ogolaanshaha adeegga. Hawshaan dib u eegis waxaa loogu yeeraa ogolaanshaha hore ee adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Hanaanka ogolaanshaha caymiska caafimaadka dhimirka waa inuu raacaa jadwallo gaar ah. Ogolaanshaha hore ee caadiga ah, caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu go'aanka ku gaaraa qaab ku dhisan codsiga dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan ee xanuunkaagu u baahan yahay. Tusaale, caymiskaagu wa ainuu dedejiyaa go'aanka ogolaanshaha uuna baxshaa ogeysiis ku salaysan jadwalka la xariira xanuunkaaga caafimdka kaasoo aan ka badnayn 72 saacadood kadib helitanaka codsiga adeegga, laakiin aan ka badnayn 14 maalmood kadib marka caymiska caafimaadka dhimirku helo codsiga.

Haddii adiga ama dhakhtarkaagu uu codsado, ama haddii caymiska caafimaadka dhimirku u baahan yahay xog dheeri ah oo uu baxsho dhakhtarkaagu uuna keeno sababta ay muhiim u tahay, jadwalka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood oo kale. Tusaalaha marka kordhin loo baahan karo ayaa ah marka caymiska caafimaadka

dhimirku aaminsan yahay inuu aqbali karo codsiga dhakhtarkaaga ee daawayn haddii ay helaan xog dheeri ah oo uu baxsho dhakhtarkaagu. Haddii caymiskaaga caafimaadka dhimirku kordhiyo jadwalka kadib codsiga dhakhtarka, degmada ayaa kuusoo diraysa ogeysiis qoraal ah oo kuu sheegaaya muddo kordhinta.

Adeegyada u baahan ogolaanshaha hore waxaa kamid ah: Adeegyada adag ee lagu baxsho guriga, Adeegyada Adag ee Maalintii, Baxnaaninta Maalintii, Adeegyada Baxnaaninta habdhaqanka, iyo Daryeelka carruurta ee baxnaaninta ah. Waa inaad caymiska caafimaadka dhimirka ka codsataa xog dheeraad ah oo ku saabsan hanaanka ogolaanshihiisa hore. Wac caymiskaaga caafimaadka dhimirka si aad u codsato xog dheeraad ah.

Haddii caymiska caafimaadka dhimirku uu diido, dib u dhigo, yareeyo, ama joojiyo adeegyada aad codsatay, caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu kuusoo diraa Ogeysiiska Go'aanka Gunnada ee Diidmada ah kaasoo kuu sheegaaya in adeegyada la diiday, kuu sheegaaya inaad soo gudbin karo racfaan, kuna siinaaya xog ku saabsan sida aad u soo gudbinayso racfaan. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada si aad u gudbiso cabasho ama racfaan marka aadan aqbalin go'aanka caymiska caafimaadka dhimirka ee diidista adeegyadaada ama uu qaado talaabooyin kale oo aadan aqbalin, ka fiiri qaybta Go'aannada Diimada Gunnada ee Caafimaadkaaga Dhimirka oo ku qoran bogga 34 ee buug-gacmeedkaan.

**Waa maxay Muhiimada Caafimaad?**

Adeegyada aad hesho waa inay yihiin kuwo caafimaad ahaan muhiim ah ayna ku haboon yihiin xalinta xanuunkaaga. Dadka jira 21 sano iyo ka wayn, adeegga ayaa caafimaad ahaan muhiim ah marka uu yahay mid macquul ah muhiimna u ah difaaca noloshaada, kahortaga xanuun daran ama naafo, kor u qaadaaya xanuunkaaga.

Shaqsiyaadka kayar da'da 21, adeegga ayaa caafimaad ahaan muhiim ah haddii adeeggu uu saxaayo, ilaalinaayo, taageeraayo, kor u qaadaayo, ama dejinaayo xanuun dhanka dhimirka ah. Adeegyada joogtaynaaya, taageeraaya, kor u qaadaaya, ama dejinaaya xaalada xanuunka dhimirka ayaa loo arkaa kuwo caafimaad ahaan muhiim ah waxaana lagu daboolayaa qaybta adeegyada Baaritaanka, Helista Xanuunka, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah.

**Sidee ayaan ku helayaa Adeegyada Kale ee Caafimaadka Dhimirka ee Aysan Daboolayn Caymiska Caafimaadka Dhimirka?**

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay caymiska daryeelka Maaraysan ee Medi-Cal, waa inaad heshaa adeegyada soo socda ee caafimaadka dhimirka oo uu baxsho Caymiska Daryeelka Maaraysan ee Medi-Cal:

- Baaritaanka iyo daawaynta caafimaadka dhimirka, ayna ku jiraan baxnaaninta shaqsiga ah, kooxda, iyo qoyska.
- Baaritaanka dhimirka iyo neerfaha marka caafimaad ahaan la cadeeyo si loo baaro xanuunka dhimirka.
- Adeegyada bukaan socodka si loola socdo daawooyinka dhakhtarku kuu qorey.
- Talo bixinta dhimirka.
- Shaybaarka bukaan socodka, daawooyinka (fadlan ogoow in inta badan daawooyinka uu daboolaayo barnaamijka Adeegyada Gaarka Loo baxsho qarashkooda ee Medi-Cal), agabka, iyo kaalmaatiyada.

Si aad u hesho mid kamid ah adeegyada kore, toos u wac qorshaha daryeelka maaraysan ee Medi-Cal. Haddii aadan haysan qorshaha daryeelka maaraysan ee Medical, waxaad awoodi kartaa inaad hesho adeegyadaan oo ay bixinayaan adeeg bixiyaal gaar ah iyo rugaha caafimaadka ee aqbala Medi-Cal. Caymiska Caafimaadka dhimirka ayaa kaa caawin kara inaad hesho ama ku siin kara fikrado ku aadan sida aad ku helayso dhakhtar ama rug caafimaad.

Farmashiye kasta oo aqbala Medi-Cal ayaa kuu buuxin kara daawooyinka laguu qorey ee lagu dawaynaayo xanuunka dhimirka. Fadlan ogoow in inta badan daawooyinka laguu qoro ee farmashiyuhu ku siiyo lagu daboolaayo barnaamijka Caymiska Adeegyada Gaarka ah ee Medi-Cal, kumana jiraan qorshaha daryeelka maaraysan.

**Sidee ayaan ku helayaa Adeegyada Kale ee Medi-Cal (Daryeelka Aasaasiga ah/Medi-Cal) ee Aysan Daboolayn Caymiska Caafimaadka Dhimirka?**

Haddii aad ku jirto qorshaha daryeelka maaraysan, qorshehaaga ayaa masuul ka ah inuu kuu helo dhakhtar. Haddii aadan ka diiwaan gashanayn qorshaha daryeelka maaraysan aadna leedahay caymiska Medi-Cal ee "caadiga ah", oo sidoo kale loo yaqaano Adeegyada Caymiska Kala Gaarka ah ee Medi-Cal, markaas waxaad u tagi kartaa dhakhtar aqabalaaya Medi-Cal. Waa inaad u sheegtaa dhakhtarka inaad leedahay caymiska Medi-Cal kahor intuusan adeegyada kuu bilaabin. Haddii kale, waxaa lagaa dalban karaa qarashka adeegyadaas.

Waxaad adeegsan kartaa dhakhtar ka baxsan caymiskaaga si aad uga hesho adeegyadaada kahortaga dhalmada.

**Ka waran Haddii aan qabo Dhibaato la xariirta Khamriga ama Daroogada?**

Haddii aad isleedahay waxaad u baahan tahay adeegyo si lagaaga daaweeyo dhibaatada khamriga ama daroogada, kala xariir degmadaada Laynka Helitanaka iyo Masiibada Adeegyada 1-888-724-7240. La taliyaasha ayaa kaa caawin kara qiimaynta baahiyahaaga kuna siin kara soo jeedino ku aadan adeegyada xanuunka isticmaalka Maandooriyaasha.

**Maxaan ugu baahan nahay Adeegyada isbitaalka ee bukaan jiifka caafimaadka dhimirka?**

Waxaa lagu dhigi karaa isbitala haddii aad qabto xanuun ama astaamaha caafimaadka dhimirka oo aan si amaan ah loogu dawayn karin daryeelka heerka hooseeya, iyo sabab la xariirta xanuun caafimaad ama astaamo dhanka caafimaadka dhimirka ah, aad:

- Khatar taagan ku tahay naftaada ama dadka kale, ama burburinta hantida ee wayn
- Aadan awoodin inaad qaadato ama adeegsato cuntada, dharka, ama hooyga
- Aad muujinayso khatar daran oo aad u gaysanayso caafimaadkaaga jireed
- Aad qabto kasii daris cusub, oo wayn oo ku timaada awoodaada shaqada sabab la xariirta xanuun dhimirka ah
- Aad u baahan tahay qiimayn dhanka dhimirka ah, daawayn caafimaad, ama daawayn kale oo keliya aad ka helayso isbitaal

## DHAKHTARKA QAYBTA A

**Sidee ayaan Ku helayaa Dhakhtarka Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee aan u Baahan nahay?**

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu soo daabaco liiska dhakhtarada hadda ka tirsan ee oonlaynka ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dhakhaatiirta hadda shaqeeya ama aad doonayso inaad hesho liiska cusub ee dhakhaatiirta, booqo webseedka caymiskaaga caafimaadka dhimirka https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html Waxaad heli kartaa liiska oo qoraal ah ama boostada laguugu soo diraayo haddii aad codsato.

Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa xadiyo ku xiri kara dookhaaga dhakhaatiirta. Marka koobaad ee aad biloowdo helitaanka adeegyada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah waxaad codsan kartaa in caymiskaaga caafimaadka dhimirku uu ku siiyo dookha koobaad oo ah ugu yaraan labo dhakhtar. Caymiskaaga caafimaadka dhimirka waa inuu sidoo kale kuu ogolaadaa inaad badesho dhakhtarkaaga. Haddii aad codsato inaad badesho dhakhtarkaaga, caymiska caafimaadka dhimirka waa inuu kuu ogolaadaa inaad kala doorato ugu yaraan labo dhakhtar ilaa heerka ugu macquulsan.

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa masuul ka ah inuu xaqijiyo inaad hesho daryeelka waqtiga ku haboon iyo inaad hesho dhakhaatiir kugu filan oo kuu dhow si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada caafimaadka dhimirka ee uu daboolo caymiska caafimaadka dhimirka haddii aad u baahato.
Mararka qaar dhakhaatiirta heshiiska kula jira caymiska caafimaadka Dhimirka ayaa doorta inay joojiyaan bixinta adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Dhakhaatiirta caymiska caafimaadka dhimirka ayaa joojin kara heshiiska kala dhexeeya caymiska caafimaadka dhimirka, ama diidi kara inay aqbalaan bukaannada adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee Medi-Cal si iskood ah ama marka uu ka

codsado caymiska caafimaadka dhimirku. Marka sidaan dhacdo, caymiska caafimaadka dhimirka waa inuu sameeyaa dedaal daacad ah si uu u siiyo ogeysiis qoraal ah qof kasta oo adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah dhakhtarka. Ogeysiiska ku socda macmiilka waa in la diraa 30 maalmood kahor taariikhda dhaqan galka joojinta ama 15 maalmood kadib marka caaymiska caafimaadka dhimirku ogaado in dhakhtarku joojinaayo shaqada. Marka ay sidaan dhacdo, caymiskaaga caafimaadka dhimirka waa inuu kuu ogolaado inaad adeegyada kasii qaadato dhakhtarka ka baxay caymiska caafimaadka dhimirka, haddii adiga iyo dhakhtarku ku heshiisaan. Tan waxaa loo yaqaanaa "siiwadista daryeelka" hoos ayaana lagu sharxay.

**Miyaan sii Wadi karaa Helitaanka Adeegyada Dhakhtarka Dhakhtarkayga Hadda?**

Haddii aad marhore helaysay adeegyada caafimaadka ee lagu baxsho caymiska daryeelka maaraysan ee Medi-Cal, waxaad sii wadi kartaa inaad daryeel ka hesho dhakhtarka xataa haddii aad adeegyada caafimaadka dhimirka ka hesho dhakhtarka caymiskaaga caafimaadka dhimirka, ilaa inta adeegyada ay heshiis ku yihiin dhakhaatiirtu adeegyaduna aysan isku mid ahayn.
Waxaa intaas dheer, haddii aad horey u helaysay adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah oo uu baxsho caymis caafimaadka dhimirka ah oo kale, qorshaha daryeelka maaraysan, ama dhakhtarka gaarka ah ee Medi-Cal, waxaad codsan kartaa "siiwadista daryeelka" si aad adeeg ugasii hesho dhakhtarkaaga hadda, ilaa muddo 12 bilood ah, marka ay jiraan xaalado gaar ah ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Haddii aad xariir jira la leedahay dhakhtarka aad codsanayso;
- Aad u baahan tahay inaad adeeg kasii hesho dhakhtarkaaga hadda si aad u sii wadato daawaynta socota ama sabab la xariirta inay dhibaato ku noqonayso caafimaadkaaga dhimirka in laguu wareejiyo dhakhtar cusub;
- Dhakhtarku uu yahay mid xirfad badan uuna buuxsho shuruudaha Medi-Cal; iyo
- Dhakhtarku uu aqbalo shuruudaha caymiska caafimaadka dhimirka ee caymiska caafimaadka dhimirka ee qandaraaska la galaaya.

## BAAXADA ADEEGYADA

Haddii aad buuxiso shuruudaha heLitaanka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, adeegyada soo socda ayaad helaysaa ayadoo laga eegaayo baahidaada. Dhakhtarkaaga ayaa kaala shaqayn doona go'aaminta noocyada adeegyada kuugu haboon.

**Adeegyada Caafimaadka Dhimirka**

- Adeegyada Caafimaadka Dhimirka waa adeegyada daawaynta ee shaqsiga ah, kooxda, ama qoyska ku salaysan ee ka caawiya dadka qaba xanuunnada dhimirka inay bartaan xirfadaha maaraynta nolol maalmoodkooda. Adeegyadaan waxaa sidoo kale ku jira shaqada dhakhtarku qabto si uu ugu fududeeyo adeegyada qofka helaaya adeegyada. Waxyaabaha noocaan ah waxaa kamid ah: qiimaynada si aad u aragto haddii aad u baahan tahay adeegga iyo haddii adeeggu kuu shaqaynaayo; qorshaynta daawada iyo adeegyada gaarka ah ee la bixin doono' iyo "jameecada," oo laga wado la shaqaynta xubnaha qoyska iyo dadka kale ee muhiimka u ah noloshaada (haddii aad ogolaato) si lagaaga caawiyo hormarinta ama joogtaynta awoodahaaga maaraynta nolosha. Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ayaa lagu bixin araa rug caafimaad ama xafiiska dhakhtarka, khadka taleefanka ama caafimaadka khadka, ama gurigaaga ama xarun kale oo bulsho. Noocyada adeegyada la heli karo waxaa kamid ah waxyaabaha soo socda:
- Baaritaannada caafimaadka dhimirka,
- Baxnaaninta kooxda iyo mida shaqsiga ah,
- Baxnaaninta kooxda iyo mida gaarka ah,
- Caawimaada dhibaatada,
- Dejinta dhibaatada,
- Daryeelka Xaalada Degdega ah ee 24 saac ah,
- Adeegyada taageerada dawada,
- Adeegyada isku dhafan ee caafimaadka Dhimirka iyo isticmaalka maandooriyaha,

- Adeegyada taageerada macmiilka iyo qoyska ee dadka dhibka horey usoo maray baxshaan,
- Daryeelka dhimirka ee bukaan jiifka,
- Daryeelka hooyga ee dadka waawayn,
- Maaraynta kiiska iyo ilaalinta,
- Adeegyada dadka aan hooyga haysan,
- Xarumaha baxnaaninta,
- Adeegyada tababarka xirfada iyo shaqada,
- Adeegyada bukaan socodka carruurta ee dugsiga lagu baxsho,
- Daawaynta maalintii, adeegyada caawinta iyo baxnaaninta dhimirka ee carruurta,
- Adeegyada Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah.

**Adeegyada Taageerada Dawada**

- Adeegyadaan waxaa ku jira qorista, siinta, qaybinta, iyo kormeerida daawooyinka caafimaadka dhimirka; waxbarashada la xariirta daawooyinka dhimirka. Adeegyada taageerada daawada ayaa lagu bixin araa rug caafimaad ama xafiiska dhakhtarka, khadka taleefanka ama caafimaadka khadka, ama guriga ama xarun kale oo bulsho.

**Maaraynta Kiiska Gaarka ah**

- Adeeggaan ayaa gacan ka gaysta helitaanka adeegyada caafimaadka, waxbarashada, bulshada, tababarka hore, tababarka shaqada, baxnaaninta, ama adeegyada kale ee bulshada marka adeegyadaan ay ku adkaadaan dadka qaba xanuunka dhimirka inay si iskood ah u helaan. Maareeyaha Kiiska Gaarka ah waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, abuurista qorshaha; xariirka, isku-dubaridka, iyo isku xirka; la socoshada bixinta adeegga si loo hubiyo in qofku helo adeegga iyo nidaamka bixinta adeegga; iyo la socoshada hormarka qofku sameeyo.

**Adeegyada Caawimaada Masiibada**

- Adeeggaan ayaa la heli karaa si xal loogu helo xaalada degdega ah ee u baahan daryeelka degdega ah. Yoolka caawimaada dhibaatada ayaa ah in la caawiyo xubnaha bulshada, si aan xaalkoodu u gaarin is bitaal la seexsho. Caawimaada dhibaatada ayaa socon kara ilaa sideed bilood waxaana lagu bixin araa rug caafimaad ama xafiiska dhakhtarka, khadka taleefanka ama caafimaadka khadka, ama guriga ama xarun kale oo bulsho.

**Adeegyada Dejinta Dhibaatada**

- Adeeggaan ayaa la heli karaa si xal loogu helo xaalada degdega ah ee u baahan daryeelka degdega ah. Dejinta dhibaatada ayaa socon karta 24 saac waana in lagu baxshaa xarunta daryeelka caafimaadka oo oo ruqsad leh oo shaqaysa 24 saac, barnaamikka bukaan socodka ee isbitaalka, ama xarunta dhakhtar ruqsad u haysta bixinta adeegyada dejinta masiibada.

**Adeegyada Xarumaha Daawaynta ee la Seexsho Dadka waawayn**

- Adeegyadana ayaa daawaynta caafimaadka dhimirka iyo xirfad dhisid siiya dadka ku nool xarumaha ruqsada leh ee baxsha adeegyada daawaynta ee lagu baxsho xarumaha la dagan yahay ee dadka qaba xanuunka dhimirka. Adeegyadana ayaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, todoba maalmood asbuucii. Medi-Cal ma daboosho qarashka qolka iyo boorka ee joogista xarunta bixisa adeegyada daawaynta ee dadka la seexiyo.

**Adeegyada Xarumaha Daawaynta la seexsho Dadka Dhibaatada ku jira**

- Adeegyadaan ayaa daawaynta caafimaadka dhimirka iyo xirfad dhisid u sameeya dadka qaba xanuunka daran ee dhimirka ama dhibaatada dareenka, laakiin aan u baahnayn daryeelka caafimaadka dhimirka ee isbitaalka. Adeegyada ayaa laga heli karaa 24 saacadood maalintii, todoba maalmood asbuucii xarumaha ruqsada leh. Medi-Cal ma daboosho qarashka qolka iyo boorka ee joogista xarunta bixisa adeegyada daawaynta ee dadka dhibaatada ku jira la seexiyo.

**Adeegyada Adag ee Daawaynta Maalintii**

- Kani waa barnaamij nidaamsan oo baxsha daawaynta caafimaadka dhimirka ee la siiyo koox dad ah oo haddii kale la seexin lahaa isbitaal ama xarun kale oo bixisa daryeel 24 saac ah. Barnaamijka ayaa socda ugu yaraan sadex saacadood maalintii. Dadka ayaa guryahooda u hoyan kara habaynkii. Barnaamijka waxaa ku jira shaqooyinka xirfad dhisida iyo baxnaaninada iyo sidoo kale baxnaaninta dhimirka.

**Baxnaaninta Maalintii**

- Kani waa barnaamij nidaamsan oo loo sameeyay inuu ka caawiyo dadka xanuunka dhimirka qaba barashada iyo hormarinta xirfadaha la qabsiga iyo nolosha iyo inay maareeyaan astaamaha xanuunka dhimirka si wanaagsan. Barnaamijka ayaa socda ugu yaraan sadex saacadood maalin kasta. Barnaamijka waxaa ku jira shaqooyinka xirfad dhisida iyo baxnaaninada.

**Adeegyada ilbitaalka ee bukaan Jiifka Caafimaadka Dhimirka**

- Kuwaani waa adeegyo lagu baxsho isbitaal ruqsad u haysta adeegga caafimaadka Dhimirka kadib marka uu go'aansho dhakhtarka caafimaadka dhimirka oo ruqsad haysta in qofku u baahan yahay daawaynta caafimaadka Dhimirka ee adag ee 24 saac ah.

**Adeegyada Xarunta Caafimaadka Dhimirka**

- Adeegyadaan ayaa lagu baxshaa inta caafimaadka dhimirka oo ruqsad leh taasoo taqasus u leh daawaynta baxnaaninta 24 saac ah ee xanuunnada dhimirka ee daran. Xarumaha Caafimaadka Dhimirka waa inay heshiis ka haystaan isbitaal ama rug caafimaad oo u dhow si ay u buuxshaan baahiyaha daryeelka jireed ee dadka xarunta jooga.

**Ma Jiraan Adeegyada Gaarka ah oo ay Heli karaan Carruurta, iyo/ama Dhalinyarada Qaangaarka ah ee kayar 21 sano?**

Macaamiisha kayar 21 sano ayaa u qalma adeegyada dheeriga ah ee Medi-Cal ee lagu baxsho guuno loo yaqaano Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah.

Si uu ugu qalmo adeegyada Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah, macmiilku waa inuu kayar yahay 21 sano uuna helaa adeegyada daboolaaya Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah ee buuxa kuwaasoo muhiim u ah sixida ama xal u helida xanuunka caafimaadka dhimirka. Adeegyada joogtaynaaya, taageeraaya, kor u qaadaaya, ama dejinaaya xaalada xanuunka dhimirka ayaa loo tixgeliyaa inay caafimaadka dhimirka caawiyaan ayna sidaas awgeed, yihiin kuwo caafimaad ahaan muhiim ah waxaana lagu daboolayaa qaybta adeegyada Baaritaanka, Helista Xanuunka, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah.

Haddii aad su'aalo ka qabto adeegyada Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah, fadan wac 1-888-724-7240 ama booqo [Webseedka Baaritaanka, Helista Cilada, iyo Daawaynta Carruurta ee Goos-gooska ah ee DHCS].

Adeegyada soo socda ayay caymiska caafimaadka dhimirka ka helayaan carruurta, kurayda, iyo da'yarta qaangaarka ah ee kayar 21 sano: Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka, Isku dubaridka daryeelka adag, Adeegyada Adag ee Guriga Lagu baxsho, iyo Adeegyada Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah.

**Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka**

Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka waa caawimaadaha adag, gaarka ah, mudada gaaban ee bukaan socodka oo la siiyo macaamiisha ilaa 21 jirka ah. Dadka helaaya adeegyadaan ayaa qaba dhibaatooyinka dhimirka oo daran, waxay waajahayaaan kala guur walwal badan ama dhibaato nololeed, waxayna u baahan yihiin adeegyada taageerada mudada gaaban, ee taageerada ah si ay u gaaraan natiijooyinka lagu cadeeyay qorshehooda qoran ee daawaynta.

Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka waa nooc kamid ah adeegga caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah oo lagu heli karo caymis kasta oo caafimaadka dhimirka ah haddii aad qabto dhibaatooyin daran oo dhanka dhimirka ah. Si aad u hesho Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka, waa inaad heshaa adeegga caafimaadka Dhimirka, aad ka yar tahay 21 sano, aadna haysato caymiska buuxa ee Medi-Cal.

- Haddii aad ku nooshahay guriga, xubin kamid ah shaqaalaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka ayaa si fool ka fool ah kaagala shaqayn kara yarayta dhibaatooyinka daran ee habdhaqanka si aad iskugu daydo inaad iskaga ilaaliso u baahashada raadsada daryeel heer intaa ka sareeya ah, sida daryeelka guriga ee kooxda ee carruurta iyo dhalinta kayar 21 sano ee qaba dhibaatooyinka dhimirka ee aadka u daran.
- Haddii aad ku nooshahay guriga koox carruur iyo dhalinyaro da'doodu ka yar tahay 21 ka kooban oo qaba xanuunka daran ee dhimirka, xubin kamid ah shaqaalaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka ayaa kaala shaqayn kara si aad u awoodo inaad u guurto daryeelka heerarka kaas kahooseeya, sida guriga qoyska aan waalidkaa ahayn ama in gurigiina lagugu cesho.

Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka ayaa kaa caawin doona adiga iyo qoyskaaga, daryeelka, ama masuulka inuu barto qaabab cusub oo loo waajaho dhibaatada habdhaqanka iyo qaabab loo kordhiyo noocyada habdhaqanka kuu sahaaya inaad guul gaarto. Adiga, xubin kamid ah shaqaalaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka iyo qoyskaaga, daryeelaha, ama masuulka ayaa ka wada shaqayn doona koox ahaan xal u helida dabeecadaha dhibaatada keenaaya muddo kooban ilaa aadan dib danbe ugu baahan Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka. Waxaad yeelan doontaa qorshaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka oo sheegaaya waxa adiga, qoyskaaga, daryeelaha, ama masuulka, iyo shaqaalaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka aad samayn doontaan inta lagu jiro Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka, iyo goorta iyo meesha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka lagu bixin doono. Shaqaalaha Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka ayaa kaala shaqayn kara inta badan meelaha aad u baahan tahay in caawimaad dhibaatada dhimirka lagugu siiyo. Goobahaan waxaa kamid ah gurigaaga, guriga waalidka ku korsaday, guriga kooxda, dugsiga, barnaamijka daawayn ee maalintii, iyo goobaha kale ee deegaanka.

**Iskudubaridka Daryeelka Adag**

Iskudubaridka Daryeelka Adag waa adeeg bixiya maaraynta kiiska gaarka ah oo fududeeya qiimaynta qorshaynta daryeelka, iyo isku dubaridka adeegyada macaamiisha kayar 21 sano kuwaasoo u qalma adeegyada buuxa ee Medi-Cal buuxshana shuruudaha muhiimada caafimaadka ee adeeggaan.

Qaybaha Adeegga Iskudubaridka Daryeelka Adag waxaa ku jira qiimaynta; qorshaynta iyo dhaqan gelinta adeegga; kormeerka iyo dhaqan gelinta; iyo kalaguurka. Adeegyada Iskudubaridka Daryeelka Adag ayaa lagu baxshaa mabaadii'da Naqshada Farsamada Aasaasiga ah ee Isku dhafan, ayna ku jirana abuurista Kooxda Ilmaha iyo Qoyska si loo xaqiijiyo fududaynta xariir wada shaqayneed oo dhex mara ilmaha, qoyskiisa, iyo nidaamyada adeegga ilmaha ee hawsha ku lugta leh.

Kooxda Ilmaha Qoyska waxaa ku jira taageerooyinka rasmiga ah (sida isku duwaha daryeelka, adeeg bixiyaasha, iyo maareeyaasha kiiska ee wakaaladaha carruurta), taageerooyinka dabiiciga ah (sida xubnaha qoyska, dariska, saaxiibada, iyo karaaniga), iyo shaqsiyaadka kale ee ka wada shaqeeya abuurista iyo dhaqan gelinta qorshaha macmiilka masuulkana ka ah ka taageerida carruurta iyo qoysaskooda joogtaynta higsiyadooda. Iskudubaridka Daryeelka Adag ayaa sidoo kale baxsha Iskuduwaha Iskudubaridka Daryeelka Adag kaasoo:

- Xaqiijiya in adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah la heli karo, la abaabulo, laguna baxsho qaab ku salaysan awood, gaar ah, macmiilku hagaayo, oo dhaqan ahaan iyo luuqad ahaanba ku haboon.
- Xaqiijinaaya in adeegyada iyo taageerooyinka lagu saleeyo baahiyaha ilmaha.
- Fududaynaaya xariir wadeshaqyn oo dhex mara ilmaha, qoyskiisa, iyo nidaamyada doorka u leh bixinta adeegyada ilmaha.
- Ka taageeraaya waalidka/daryeelaha buuxinta baahiyaha ilmaha.
- Gacan ka gaysanaaya dhisida Kooxda Ilmaha iyo oyska siinaayana taageero joogto ah.
- Wuxuu abaabulayaa uuna isku aadinayaa daryeelka dhammaan adeeg bixiyaasha iyo nidaamyada u adeegga carruurta si loogu sahlo ilmaha in loogu adeeggo bulshadiisa.

**Adeegyada Adag ee Lagu Baxsho Guriga**

Adeegyada Adag ee Lagu Baxsho Guriga waa caawimaado gaar ah, oo ku salaysan awood loona sameeyay in lagu badelo ama xanuunnada dhimirka ee carqalada ku ah shaqada ilmaha/dhalinta looguna talagalay ka caawinta ilmaha/dhalinta dhisida xirfadaha muhiimka u ah shaqo guul leh oo ay ka gaaraan guriga iyo bulshada iyo kor u qaadista awooda qoyska ilmaha/dhalinta ee ka caawinta ilmaha/dhalinta inuu guul ka gaaro guriga iyo bulshada.

Adeegyada Adag ee Lagu Baxsho Guriga ayaa lagu baxshaa si waafaqsan qorshaha daawaynta ee gaarka ah oo lagu sameeyay Qaabka Farsamada Aasaasiga ahee Isku Dhafan ee ay samayso Kooxda Ilmaha iyo Qoyska oo kaashanaysa qorshaha adeegga guud ee qoyska, kaasoo ay ku jiri karaan, laakiin kuma koobna qiimaynta, abuurista qorshaha, baxnaaninta, dhaqan celinta, iyo iskaashiga qoyska iyo asxaabta. Adeegyada Adag ee Lagu Baxsho Guriga ayaa la siiyaa macaamiisha kayar 21 sano ee u qalma adeegyada buuxa ee caymiska Medi-Cal buuxshana shuruudaha muhiimada caadimaadka ee adeeggaan.

**Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah**

Naqshada Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah ayaa sahlaysa bixinta adeegyada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee mudada gaaban, adag, weelaaya uur kutaalooyinka, gaarkana ah ee carruurta kayar 21 sano ee qaba baahiyaha badan ee dhimirka iyo dabeecadaha. Adeegyada waxaa ku jira abuurista qorshaha, dhaqan celinta, iyo caawimaada guud. Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah, carruurta ayaa loo dhiibaa waalidiin tababaran, aad loo kormeero, loona taageero oo baxsha Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah.

**Adeegyada lagu heli karo Taleefanka ama Caafimaadka Khadka**

Adeegyada lagu bixin karo taleefanka ama caafimaadka khadka:

- Adeegyada Caafimaadka Dhimirka
- Adeegyada Taageerada Dawada
- Adeegyada Caawimaada Masiibada
- Maaraynta Kiiska Gaarka ah
- Iskudubaridka Daryeelka Adag
- Adeegyada Taageerada Dadka isku daruufta ah isa siiyaan

Qaybaha qaar ee adeegga ayaa lagu bixin karaa caafimaadka khadka ama taleefanka:

- Adeegyada Adag ee Daawaynta Maalintii
- Baxnaaninta Maalintii
- Adeegyada Xarumaha Daawaynta ee la Seexsho Dadka waawayn
- Adeegyada Xarumaha Daawaynta la seexsho Dadka Dhibaatada ku jira
- Adeegyada Dejinta Dhibaatada

Adeegyada aan lagu bixin karin taleefanka ama caafimaadka khadka:

- Adeegyada Xarunta Caafimaadka Dhimirka
- Adeegyada iIbitaalka ee bukaan Jiifka Caafimaadka Dhimirka
- Adeegyada Baxnaaninta Habdhaqanka
- Adeegyada Adag ee Lagu Baxsho Guriga
- Daryeelka Carruurta la Korsado ee Baxnaaninta ah

## GO'AANKA DIIDMADA GUNNADA EE UU SOO SAARO CAYMISKAAGA CAAFIMAADKA DHIMIRKA

### Waa maxay Xuquuqda aan Leeyahay haddii Caymiska Caafimaadka Dhimirku Diido Adeegyada aan Doonaayo ama Aan aaminsan Nahay inaan U baahan Nahay?

Haddii caymiskaaga caafimaadka dhimirka ama dhakhtarka oo masuul ka ah caymiskaaga caafimaadka dhimirka uu diido, xadido, yareeyo, dib u dhigo, ama joojiyo adeegyada aad doonayso ama aad aamisan tahay inaad xaq u leedahay inaad hesho, waxaad xaq u leedahay in laguu soo diro Ogeysiis qoraal ah (oo loo yaqaano "Ogeysiiska Go'aaminta Gunnada Daran") oo aad ka helayso caymiska caafimaadka dhimirka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad diido go'aanka adoo codsanaaya racdaan. Qaybaha hoose ayaa ka hadlaaya xuquuqdaada Ogeysiiska iyo waxa aad samayn karto haddii aad diido go'aanka caymiskaaga caafimaadka dhimirka.

### Waa Maxay Go'aanka Diidmada Gunnadu?

Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa lagu qeexaa wax kamid ah talaabooyinka soo socda uu qaado caymiska caafimaadka dhimirka:

1. Diidmada ama xadidida ogolaanshaha adeegga la codsaday, ayna ku jiraan go'aannada lagu saleeyay nooca ama heerka adeegga, muhiimada caafimaadka, haboonaanta, goobta, ama waxtarka adeegga la daboolaayo;
2. Yaraynta, hakinta, ama joojinta adeeg horey loo ogolaaday;
3. Diidmada, si guud ama qayb ahaan, lacagta adeegga;
4. Fashilka bixinta adeegyada oo lagu baxsho qaab ku haboon waxtiga;
5. Ku fashilmida ku hawlgelida jadwalka loo asteeyay si loo gaaro xal guud oo ku aadan cabashooyinka iyo racfaannada (haddii aad cabasho u gudbiso caymiska caafimaadka dhimirka uusana caymiska caafimaadka dhimirku kugusoo celin go'aanka qoraalka ah oo ku aadan cabashadaada 90 maalmood gudahood.

Haddii aad racfaan u gudbisay caymiska caafimaadka dhimirka uusana caymiska caafimaadka dhimirku go'aanka qoraalka ah kaa siin racfaankaaga 30 maalmood gudahood, ama haddii aad gudbisay racfaan degdeg ah, aadana helin jawaab 72 saacadood gudahood); ama

6. Diidmada codsiga macmiilka ee diidista masuuliyada dhaqaale.

**Waa Maxay Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?**

Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu waa waraaq caymiskaaga caafimaadka dhimirku uu kuusoo diri doono haddii uu gaaro go'aan uu ku diidaayo, ku xadidaayo, ku yareynaayo, dib ugu dhigaayo, ama uu ku joojinaayo adeegyada aad adiga iyo dhakhtarkaagu aaminsan tihiin inaad xaq u leedahay. Tan waxaa ku jira diidmada qarashka adeegga, diidmo ku saleysan sheegashada ah inaan adeegyada caymisku daboolin, diidmo ku salaysan sheegashada ah in adeegyadu aysan caafimaad ahaan muhiim ahayn, diidmo ku salaysan in adeeggu uu la xariiro nidaamka adeeg bixinta oo khaldan, ama diidmada codsiga dood ku aadan masuuliyada dhaqaale. Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa sidoo kale loo adeegsadaa in lagugu wargeliyo haddii cabashadaada, racfaankaaga, ama racfaankaaga degdega ah aan xal laga gaarin waqtigii la rabay, ama haddii aadan ku helin adeegyada mudada loo cayimay in caymiska caafimaadka dhimirku ku baxsho adeegyada.

**Waqtiga Ogeysiiska**

Caymisku waa inuu ogeysiiska boostada ugu diraa macmiilka ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda talaabada joojinta, hakinta, ama yaraynta adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee horey loo ogolaaday. Caymisku waa inuu sidoo kale boostada ugu diraa macmiilka ogeysiiska labo maalmood gudahood marka uu soo baxo go'aanka diidmada lacag bixinta ama go'aannada ka dhashay diidmada, dib u dhigista, ama wax ka badelka dhammaan ama qayb kamid ah adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee la codsaday.

**Markasta Miyaan Heli Doonaa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada Marka aanan Helin Adeegga aan Rabay?**

Waxaa jira mararka qaar oo aadan heli karin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada. Wali waxaad racfaan u gudbin kartaa Caymiska Gobalka ama haddii aad buuxisay racdaanka, waxaad codsan kartaa dhageysiga gobalka marka arimahaan dhacaan. Xog ku aadan sida loo gudbiyo racfaan ama codsiga dhageysiga cadaalada ah ayaa ku qoran buug0gacmeedkaan. Xogta ayaa sidoo kale laga heli karaa xafiiska dhakhtarkaaga.

**Muxuu Ii sheegi Doonaa Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?**

Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ayaa kuu sheegi doona:

- Go'aanka caymiskaaga caafimaadka dhimirku uu gaaray ee saamaynaaya adiga iyo awoodaada helitaanka adeegyada
- Taariikhda go'aanku dhaqan galaayo iyo sababta go'aanka loo cuskaday
- Sharciyada gobalka iyo federaalka ee go'aanka loo cuskaday
- Xaqa aad u leedahay gudbinta racfaan haddii aadan aqbalin go'aanka caymiska caafimaadka Dhimirka
- Sida aad racfaan ugu gudbin karto caymiska caafimaadka dhimirka
- Sida loo codsado Dhageysiga Gobalka haddii aadan ku qancin go'aanka caymiska caafimaadka dhimirka ka gaaray racfaankaaga
- Sida aad u codsan karto racfaan degdeg go'aan looga gaaro ama Dhageysiga Gobalka ee degdega ah
- Sida aad ku helayso caawimaad la xariirta gudbinta racfaan ama codsashada Dhageysiga Gobalka
- Mudada aad haysato si aad u gudbiso racfaan ama u codsato Dhageysiga Gobalka

- Xaqa aad u leedahay inaad adeegyada sii hesho inta aad sugayso go'aanka laga gaaro racfaanka ama Dhageysiga Gobalka, sida loo codsado sii wadista adeegyada, iyo haddii qarashaadka adeegyadaan ay daboolayso Medi-Cal
- Marka ay tahay inaad gudbiso codsiga racfaanka ama Dhageysiga Gobalka haddii aad doonayso in adeegyada laguusii wado

**Maxaan Samaynayaa Marka aan Helo Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnadu?**

Marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, waa inaad akhridaa dhammaan xogta ku qoran ogeysiiska si taxadar leh. Haddii aadan fahmayn ogeysiiska, caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa ku caawin kara. Waxaad sidoo kale codsan kartaa qof kale inuu ku caawiyo.

Haddii caymiska caafimaadka dhimirku kuu sheego in adeegyadaada la joojin doono ama la yareeyay aadana aqbalin go'aanka, waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso racfaan ka dhan ah go'aankaas. Waxaad sii wadi kartaa inaad hesho adeegyada ilaa racfaanka ama Dhageysiga Gobalka go'aan kasoo baxo. Waa inaad codsataa in laguu sii wado adeegyada ugu danbayn 10 maalmood kadib marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada ama kahor taariikhda dhaqan galka isbadelka.

## HANAANKA XALINTA CAQABADAHA: GUDBINTA CABASHO AMA RACFAAN

### Ka waran Haddii Aanan ka Helin Adeegyada Aan rabay Caymiska Caafimaadka Dhimirka?

Caymiskaaga caafimaadka dhimirku waa inuu lahaadaa hanaan aad u marto xalinta cabasho ama cilad la xariirta adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee aad doonayso ama aad hesho. Kan waxaa loo yaqaanaa hanaanka xalinta caqabadaha waxaana ku jiri kara:

1. **Hanaanka Cabashada:** muujinta inaadan ku qanacsanayn wax la xariira adeegyadaada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ama caymiska caafimaadka dhimirka.
2. **Hanaanka Racfaanka:** dib u eegista go'aan (tusaale, diidmada, joojinta, ama yareynta adeegyada) kaasoo laga gaaray adeegyadaada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah uuna gaaray caymiska caafimaadka dhimirka ama dhakhtarkaagu.
3. **Hanaanka Dhageysiga Gobalka:** hanaan lagu codsado dhageysiga maamulka oo la horgeynaayo garsooraha sharciga maamulka haddii caymiska caafimaadka dhimirku diido racfaankaaga.

Gudbinta cabasho, racfaan, ama codsashada Dhageysiga Gobalka ayaan laguu adeegsan karin mana saamayn doonaan adeegyada aad helayso. Gudbinta cabasho ama racfaan ayaa kaa caawinaysa helitaanka adeegyada aad u baahan tahay iyo xal u helida caqabadaha kaa haysta adeegyadaada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Cabashooyinka iyo racfaannada ayaa sidoo kale caawinaaya caymiska caafimaadka dhimirka ayagoo siinaaya xogta ay u adeegsan karaan kor u qaadista adeegyada. Marka cabashadaada ama racfaanka lasoo gaba-gabeeyo, caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa kuu sheegaaya adiga iyo dadka kale ee ay qusayso, sida dhakhaatiirta, natiijada kama danbaysta ah. Marka go'aan lagasoo saaro Dhageysigaaga Gobalka, Xafiiska Dhageysiga Gobalka ayaa kuu sheegi doona adiga iyo dhinacyada kale ee ay qusayso natiijada kama danbaysta ah. Waxaad xog badan a ogaan kartaa hanaan kasta oo xalinta caqabadaha ah oo hoos ku qoran.

**Miyaan Heli karaa Caawimaad Ku aadan Gudbinta Racfaan, Cabasho, ama Dhageysiga Gobalka?**

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa kaa caawin doona sharaxaada hanaanadaan waana inuu kaa caawiyaa gudbinta cabasho, racfaan, ama codsiga Dhageysiga Gobalka. Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa sidoo kale kaa caawin kara go'aansashada haddii aad u qalanto waxa loogu yeero hanaanka "racfaanka degdega ah", kaasoo ka dhigan in degdeg dib u eegis loogu samayn doono sababo la xariira caafimaadkaaga, caafimaadka dhimirka, iyo/ama sugnaantaada oo khatar ku jira. Waxaad sidoo kale u fasixi kartaa hal qof inuu ku matalo, uuna ku jiro dhakhtarkaaga gaarka ah ee caafimaadka dhimirka ama qareenka.
Haddii aad doonayso in lagu caawiyo, hesho Adeegyada Bukaan Jiifka ama Dadka Jiifsho, wac Adeegyada u Doodista Bukaanka ee Qoyska Yuhuuda ah ee San Diego San Diego (JFS) ood ka wacayso 619-282-1134 ama 1-800-479-2233. Si aad u hesho Adeegyada Bukaan Socodka, wac Xarunta Macaamiisha ee U doodista iyo Waxbarashada Caafimaadka (CCHEA) oo aad ka wacayso 1-877-734-3258. Caymiskaaga caafimaadka dhimirka waa inuu ku siiyaa caawimaad macquul ah oo ku aadan buuxinta foomamka iyo talaabooyinka kale ee la xariira cabashada ama racfaanka. Caawimaadan waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna, inuu ku siiyo adeegyada turjumaanka iyo lambaro aad lacag la'aan ku wacayso oo leh adeegyada TTY/TDD iyo tayada turjumaanka.

**Gobalku ma Iga Caawin karaa Caqabadayda/Su'aalaha aan qabo?**

Waxaad la xariiri kartaa Waaxda Adeegyada Daryeelka caafimaadka, Xafiiska Dhex-dhexaadiyaha, Isniinta ilaa Jimcada, 8 a.m. ilaa 5 p.m. (marka laga reebo maalmaha fasaxa), khadka taleefanka **888-452-8609** ama ciwanaka iimeelka MMCDOmbudsmanOffice@dhcs.ca.gov. **Fadlan ogoow:** Fariimaha iimeelka ayaan ahayn kuwo qarsoodi ah. Waa inaadan soo raacin xogtaada gaarka ah fariinta iimeelka.

Waxaad sidoo kale heli kartaa caawimaad sharci oo bilaash aad uga helayso xafiiska caawimaada sharciga (legal aid) ee deegaankaaga ama kooxaha kale. Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) si aad wax uga weydiiso xuquuqdaada dhageysiga adoo la xariiraaya Qaybteeda Su'aalaha iyo Jawabata Dadwaynaha oo aad ka helayso taleefanka **800-952-5253** (adeegyada TTY, wac **800-952-8349**).

## HANAANKA CABASHADA

### Waa maxay Cabasho?

Cabasho waa muujinta qanaaco la'aan ku aadan wax quseeya adeegyadaada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah kuwaasoo aan ahayn mid kamid ah caqabadaha lagu xaliyo hanaannada racfaanka iyo Dhageysiga Gobalka.

### Waa maxay Hanaanka Cabashadu?

Hanaanka cabashadu waa hanaanka caymiska caafimaadka dhimirku ku helaayo cabashadaada ama tabashadaada ku aadan adeegyada ama caymiska caafimaadka dhimirka. Cabasho ayaa lasoo gudbin karaa xili kasta hadal ahaan ama qoraal ahaan, gudbinta cabashana kuuma keenayso inaad lumiso xuquuqdaada ama adeegyada. Haddii aad gudbiso cabasho, dhakhtarkaaga ayaan dhibaato gaarayn.

Waxaad u ogolaan kartaa qof kale, qareen, ama dhakhtarkaaga inuu ku matalo. Haddii aad u wakiilato qof kale inuu ku matalo, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kaa codsan kara inaad saxiixdo foom cadaynaaya in caymiska caafimaadka dhimirku siiyo qofka qofkaas.

Qof kasta oo u shaqeeya caymiska caafimaadka dhimirka kaasoo go'aan ka gaara cabashada waa inuu u qalmaa gaarista go'aannada uusana qayb ka ahayn heerar hore oo la xariiray dib u eegista ama gaarista go'aanka.

### Goorma ayaan Gudbin karaa Cabasho?

Waxaad u gudbin kartaa cabasho xili kasta caymiska caafimaadka dhimirka haddii aadan ku qancin adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ama aad qabto tabasho kale oo la xariirta caymiska caafimaadka dhimirka.

**Sidee ayaan u Gudbin karaa Cabasho?**

Waxaad wici kartaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka si aad u hesho caawimaada gudbinta cabasho. Cabashada waxaa lagu gudbin karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan. Cabashooyinka afka laga sheego ayaan u baahnayn inaad soo raaciso qoraal. Haddii aad dooneyso inaad cabashadaada kusoo gudbiso qoral ahaan, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa ku siin doona boqshadu ciwaankoodu ku qoran yahay oo aad ka helayso dhammaan xarumaha dhakhaatiirta si aad boostada ugusoo dirto cabashadaada. Haddii aadan haysan boqshada uu ku qoran yahay ciwaanka caymisku, waxaad cabashadaada toos boostada ugu diri kartaa ciwaanka ku qoran bogga hore ee buug-gacmeedkaan.

- Si aad u hesho Adeegyada Bukaan Jiifka ana Hooyga, wac Adeegga U doodista Bukaanka ee JFS oo aad ka wacayso 619-282-1134 ama 1-800-479-2233.
- Si aad u hesho Adeegyada Bukaan Socodka, ka wac CCHEA lambarka 1-877-734-3258.

**Sidee ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Caymiska Caafimaadka Dhimirku uu Helay Cabashadayda?**

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu kuu sheego inay heleen cabashadaada ayagoo kuu soo diraaya xaqiijin qoraal ah.

**Goorma Ayaa Cabashadayda Go'aan laga Gaaryaaa?**

Caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu go'aan ka gaaro cabashadaada 90 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda aad gudbisay cabashadaada. Jadwalka gaarista go'aanka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama caymiska caafimaadka dhimirku aamisan yahay in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay dantaadu ku jirto. Tusaalaha marka dib u dhigistu noqon karto maskalaxadaada waa marka caymiska caafimaadku aaminsan yahay in uu awoodi karo inuu xal u helo cabashadaada haddii la siiyo waqti dheeri ah oo uu xog kaaga helo adiga ama dadka kale ee ay qusayso.

**Sidee ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Caymiska Caafimaadka DHImirku Uu gaalay Go'aan Ku aadan Cabashadayda?**

Marka go'aan laga gaaro cabashadaada, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kuu sheegi doona adiga ama wakiilkaaga qaab qoraalka ah go'aanka uu gaaray. Haddii caymiskaaga caafimaadka dhimirku ku fashimo inuu kuu sheego adiga ama dhinacyo kasta oo ay qusayso go'aanka laga gaaray cabashada waqtiga ku haboon, markaas caymiska caafimaadka ayaa ku siin doona Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada asagoo kuu sheegaaya xaqa aad u leedahay inaad codsato Dhageysiga Gobalka. Caymikaaga caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu ku siiyo Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada maalinta waqtiga la cayimay ku egyahay. Waxaad wici kartaa caymiska caafimaadka dhimirka si aad u hesho xog dheeri ah haddii aadan helin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada.

**Ma Jiraa Waqti u Cayiman Gudbinta Cabashada?**

Maya, waxaad soo gudbin kartaa cabashada xili kasta.

## HANAANKA RACFAANKA (HEERKA CAADIGA AH IYO KAN BOOBSIISKA AH)

Caymiskaaga caafimaadka dhimirku waa inuu kuu ogolaado inaad racfaan ka qaadato go'aanka caymiskaaga caafimaadka dhimirka ee aadan aqbalin aadna codsato in diB U eegis lagu sameeyo go'aannada qaar ee uu gaaro caymiska caafimaadka dhimirka ama dhakhaatiirtaada ee la xariira adeegyadaada caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah. Waxaa jira labo qaab oo aad ku codsan karto dib u eegis. Hal qaab waa adeegsiga hanaanka racfaanka ee caadiga ah. Qaabka kale waa inaad adeegsato hanaanka racfaanka boobsiiska ah. Labadaan nooc ee racfaanka ayaa iskumid ahl hase yeeshee, waxaa jira shuruudo gaar ah oo aad ugu qalmayso racfaan boobsiis ah. Shuruudaha gaarka ah ayaa hoos lagu sharxay.

**Waa maxay Racfaanka Caadiga ah?**

Racfaanka caadiga ah waa codsiga dib u eegis lagu sameynaayo go'aan uu gaaray caymiska caafimaadka dhimirka ama dhakhtarkaaga kaasoo ay ku jirana diidmada ama isbadellada lagu samaynaayo adeegyada aad isleedahay waad u baahan tahay. Haddii aad codsato racfaan caadi ah, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa qaadan kara ilaa 30 maalmood si uu dib u eegis u sameeyo. Haddii aad isleedahay sugista 30 maalmood waxay khatar gelinaysaa caafimaadkaaga, waa inaad codsataa "racfaan boobsiis ah." Hanaanka racfaanka caadiga ah ayaa:

- Kuu sahlaaya inaad cabasho kusoo gudbiso cod hadal ahaan ama qoraal ahaan.
- Xaqiijinaaya in racfaanka aan wax kaa dhan ah loo adeegsan doonin adiga ama dhakhtarkaaga sinaba.
- Kuu sahlaaya inaad qof kale u wakiilato inuu wakiil kaa noqdo, uuna ku jiro dhakhtar. Haddii aad u wakiilato qof kale inuu ku matalo, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kaa codsan kara inaad saxiixdo foom cadaynaaya in caymiska caafimaadka dhimirku siiyo qofka qofkaas.
- Xaqiijinaaya in laguu sii wado gunnooyinkaaga marka aad codsato racfaanka waqtiga loo cayimay gudihiis, kaasoo ah 10 maalmood laga bilaabo taariikhda

Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada laguugu soo diray boostada ama toos laguugu dhiibay. Qasab maaha inaad bixiso qarashka adeegyada laguusii wadaayo inta racfaanka aan wali go'aan laga gaarin. Hase yeeshee, haddii aad codsato in laguu sii wado gunnada, go'aanka kama danbaysta ah ee racfaankuna xaqiijiyo go'aanka hoos u dhigista ama joojinta adeegga aad hesho, waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso qarashka adeegyada la baxshay inta racfaanku taagan yahay.

- Xaqiijinaaya in dadka gaaraaya go'aanka racfaankaaga ay yihiin kuwo khibrad u leh aysana kasoo qaybgelin dib u eegis hore ama go'aan horey looga gaaray racfaanka.
- Wuxuu kuu sahlayaa adiga ama wakiilkaaga inuu qiimeeyo galka kiiskaaga, uuna ku jiro diiwaankaaga caafimaadka, iyo dukumiintiyo kale oo kasta ama diiwaannada la tixgelinaayo inta lagu jiro hanaanka racfaanka.
- Wuxuu kuu sahlayaa inaad hesho fursad macquul ah oo aad ku keento cadayn iyo marqaati aadna kusoo gudbiso dood sharci oo xaqiiqada ku dhisan, si toos ah, ama qoraal ahaan.
- Wuxuu kuu sahlayaa adiga, wakiilkaaga, ama wakiilka sharciga ah ee guriga macmiilka dhintay in lagu daro si ay qayb uga noqdaan racfaankaaga.
- Wuxuu kuu sheegayaa in racfaankaaga la helay asagoo kuusoo diraaya qoraal xaqiijin ah.
- Wuxuu kuu sheegayaa xaqa aad u leedahay inaad codsato Dhageysiga Gobalka, kadib marka la dhameeyo hanaanka racfaanka aad u gudbisay caymiska caafimaadka dhimirka.

**Goorma ayaan Gudbin karaa Racfaan?**

Waxaad u gudbin kartaa racfaan caymiskaaga caafimaadka dhimirka marka ay jiraan wax kamid ah xaaladaha soo socda:

- Caymiska caafimaadka dhimirka ama mid kamid ah dhakhaatiirta qandaraaska kula jirta uu go'aansado in aadan u qalmin helista wax kamid ah adeegyada

Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee Medi-Cal sabab la xariirta inaadan buuxin shuruudaha muhiimada caafimaadka.

- Dhakhtarkaagu uu aaminsan yahay inaad u baahan tahay adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah uuna ka codsaday caymiska caafimaadka dhimirka inuu ogolaado, laakiin caymiska caafimaadka dhimirku uusan aqbalin ama diiday codsiga dhakhtarkaaga, ama uu badelo nooca ama heerka adeegga.
- Dhakhtarkaagu uu ka codsato caymiska caafimaadka dhimirka ogolaansho, laakiin caymiska caafimaadka dhimirku uu u baahan yahay xog dheeri ah si uu u gaaro go'aanka uusana ku dhamaystirin hanaanka ogolaanshaha waqtigii la rabay.
- Caymiskaaga caafimaadka dhimirku uusan kugu siin adeegyada mudadii uu caymiska caafimaadka dhimirku u cayimay.
- Aadan aaminsanayn in caymiska caafimaadka dhimirku uu ku siinaayo adeegyada xili ku haboon si loo daboolo baahiyahaaga.
- Aan cabashadaada, racfaanka, ama racfaanka boobsiiska ah aan xal looga gaarin waqtigii loo cayimay.
- Adiga iyo dhakhtarkaagu iinaan ku heshiin adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee aad u baahan tahay.

**Sidee ayaan u Gudbin karaa Racfaan?**

Waxaad wici kartaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka si aad u hesho caawimaada gudbinta racfaan. Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa ku siin doona boqshadu ciwaankoodu ku qoran yahay oo aad ka helayso dhammaan xarumaha dhakhaatiirta si aad boostada ugusoo dirto racfaankaaga. Haddii aadan haysan boqshada ciwaanku ku yaalo, waxaad racfaanka toos ugu diri kartaa boostada ciwaanka ku qoran bogga hore ee buug-gacmeedkaan ama waxaad racfaanka ugu diri kartaa iimeelka ama fakiska ContactBHS.hhsa@sdcounty.ca.gov ama fakis ugu dir 619-236-1953.

**Sidee Ayaan Ku Ogaanayaa In Racfaankayga Go'aan Laga Gaaray?**

Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa ugu sheegi doona adiga ama wakiilkaaga qaab qoraal ah go'aanka uu ka gaaray racfaankaaga. Ogeysiiska waxaa ku qornaan doona xogta soo socota:

- Natiijooyinka hanaanka xalinta racfaanka
- Taariikhda go'aanka racfaanka lasoo saaray
- Haddii racfaankaaga aan si buuxda loogu go'aamin sidii aad rabtay, ogeysiiska waxaa sidoo kale ku jiri doonta xog ku aadan xaqa aad u leedahay Dhageysiga Gobalka iyo hanaanka gudbinta Dhageysiga Gobalka

**Ma Jiraa Waqti u Cayiman Gudbinta Racfaanka?**

Waa inaad kusoo gudbisaa racfaanka 60 maalmood gudahood kadib marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada. Ma jiraan waqtiyo u cayiman gudbinta racfaanka marka aadan helin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, marka waxaad gudbin kartaa racfaanka noocaan ah marka aad doonto.

**Goorma ayaa go'aan Laga Gaarayaa Racfaankayga?**

Caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu go'aan ka gaaraa racfaankaaga 30 maalmood gudahood laga biaabo marka caymiska caafimaadka dhimirku helay codsigaaga racfaanka. Jadwalka gaarista go'aanka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama caymiska caafimaadka dhimirku aamisan yahay in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay dantaadu ku jirto. Tusaalaha marka dib u dhigistu la xariirto maskalaxadaada waa marka caymiska caafimaadku aaminsan yahay in uu awoodi karo inuu ogolaado racfaankaaga haddii waqti dheeri ah la siiyo si uu xog kaaga qaado adiga ama dhakhtarkaaga.

**Ka Waran Haddii aanan Sugi Karin 30 Maalmood Go'aanka Racfaankayga?**

Hanaanka racfaanka ayaa la boobsiin karaa haddii uu u qalmo hanaanka racfaanka boobsiiska ah.

**Waa maxay Racfaanka Boobsiiska ah?**

Racfaanka boobsiiska ah waa qaab degdeg ah oo go'aan looga gaaro racfaan. Hanaanka racfaanka ayaa raaca isla nidaamka hanaanka racfaanka caadiga ah. Hase yeeshee, waa inaad keentaa cadaynta in sugitaank racfaanka caadiga ah ay ugasii darayso xanuunkaaga dhimirka. Hanaanka racfaanka boobsiiska ah ayaa sidoo kale raacaaya waqtiyo gaar ah oo cayiman kuwaasoo ka duwan kan racfaanka caadiga ah. Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa haysta 72 saacadood si uu dib u eegis ugu sameeyo racfaanka boobsiiska ah. Waxaad gudbin kartaa codsiga afka ah ee racfaanka boobsiiska ah. Qasab maaha inaad codsigaaga racfaanka degdega ah kusoo gudbiso qoraal ahaan.

**Goorma ayaan Gudbin karaa Racfaan Boobsiis ah?**

Haddii aad aaminsan tahay in sugista 30 maalmood si loo gaaro go'aanka caadiga ah ee racfaanka ay khatar gelinayso noloshaada, caafimaadka, ama awooda helista, xakamaynta ama joogtaynta shaqada buuxda, waxaad codsan kartaa in racfaanka degdeg go'aan looga gaaro. Haddii caymiska caafimaadka dhimirku aqbalo in racfaankaagu buuxiyay shuruudaha racfaan degdeg ah, caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa xalin doona racfaankaaga degdeg ah 72 saacadood gudahood kadib marka caymiska caafimaadka dhimirku helo racfaanka. Jadwalka gaarista go'aanka ayaa la kordhin karaa 14 maalmood haddii aad codsato muddo kordhin, ama caymiska caafimaadka dhimirku muujiyo in loo baahan yahay xog dheeri ah ama in dib u dhigista ay maslaxadaadu ku jirto.

Haddii caymiskaaga caafimaadka dhimirku kordhiyo waqtiga, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa ku siin doona sharaxaad qoraal ah oo sheegaysa sababta waqtigii la cayimay loo dhaafay. Haddii caymiska caafimaadka dhimirka uu go;aansho in racfaankaagu uusan u qalmin racfaanka boobsiiska ah, caymiska caafimaadka dhimirka waa inuu sameeyaa dedaallada ku haboon si uu kuu siiyo ogeysiis degdeg ah oo afka ah wuxuuna ogeysiis qoraal ah kuusoo dirayaa labo maalmood gudahood asagoo kuu sheegaaya sababta go'aanka uu u gaaray. Racfaankaaga ayaa raaci doona jadwalka caadiga ah ee racfaanka ee horey loogu cadeeyay qaybtaan. Haddii aadan aqbalin go'aanka caymiska caafimaadka dhimirka ee ah in aan racfaankaagu buuxin shuruudaha racfaanka boobsiiska ah, waxaad gudbin kartaa cabasho.

Marka caymiska caafimaadka dhimirka uu xaliyo codsigaaga racfaanka boobsiiska ah, caymiska caafimaadka dhimirka ayaa kuu sheegi doona adiga iyo dhammaan dhinacyada ay qusayso hadal ahaan iyo qoraal ahaan.

**HANAANKA DHAGEYSIGA GOBALKA**

**Waa maxay Dhageysiga Gobalku?**

Dhageysiga Gobalku waa dib u eegis madax banaan, oo uu sameeyo garsooraha sharciga maamulka kaasoo u shaqeeya Waaxda Adeegyada Bulshada ee California, si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee aad xaqa u leedahay inuu ku siiyo barnaamijka Medi-Cal. Waxaad sidoo kale booqan kartaa webseedka Waaxda Adeegyada Bulshada ee California oo ah https://www.cdss.ca.gov/hearing-requests si aad u hesho xog dheeraad ah.

**Waa Maxay Xaquuqdayda Dhageysiga Gobalka?**

Waxaad xaq u leedahay:

- Inuu kiiskaaga dhageysto garsooraha sharciga maamulka (oo sidoo kale loo yaqaano Dhagaysiga Gobalka)
- In xog lagaa siiyo sida aad u codsan karto Dhageysiga Gobalka
- In xog lagaa siiyo xeerarka maamulaaya matalaada matalaada aad ku helayso Dhageysiga Gobalka
- In laguu sii wado gunnooyinka marka aad codsato inta lagu jiro hawsha Dhageysiga Gobalka haddii aad codsato Dhageysiga Gobalka Inta lagu jiro waqtiga loo cayimay

**Goorma ayaan Gudbin karaa Dhageysiga Gobalka?**

Waxaad soo gudbin kartaa Dhageysiga Gobalka marka ay jiraan wax kamid ah xaaladaha soo socda:

- Haddii aad dirtay racfaan aadna heshay waraaqda qaraarka racfaanka oo kuu sheegaysa in caymiskagaaga caafimaadka dhimirku uu diiday codsigaaga racfaanka.

- Aan cabashadaada, racfaanka, ama racfaanka boobsiiska ah aan xal looga gaarin waqtigii loo cayimay.

**Sidee ayaan U Codsanayaa Dhageysiga Gobalka?**

Waxaad ka codsan kartaa Dhageysiga Gobalka:

- Oonlaynka barta: https://acms.dss.ca.gov/acms/login.request.do
- Qoraal ahaan: Codsigaaga u dir waaxda faya dhawrka ee degmada oo aad ugu direyso ciwaanka ku qoran Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, ama boostada ugu dir:

  California Department of Social Services State Hearings Division
  P.O. Box 944243, Mail Station 9-17-37
  Sacramento, CA 94244-2430

  Ama fakiska ugu dir: **916-651-5210** ama **916-651-2789**.

Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa Dhageysiga Gobalka ama Dhageysiga Gobalka ee boobsiiska ah:

- Taleefanka: Ka wac Waaxda Dhageysiga Gobalka, laynka bilaashka ah, oo ah **800-743-8525** ama **855-795-0634**, ama ka wac laynka Su'aalaha iyo Jawaabaha Dadwaynaha, ee bilaashka ah, oo ah **800-952-5253** ama TDD oo ah **800-952-8349**.

**Ma Jiraa Waqti U cayiman Dhageysiga Gobalka?**

Haa, waxaad haysataa keliya 120 maalmood gudahood si aad u codsato Dhageysiga Gobalka. Mudada 120 maalmood ayaa bilaabanaysa midkood maalinta ka danbaysa marka caymiska caafimaadka dhimirku uu toos kuu siiyo ogeysiiska go'aanka racfaanka ama maalinta ka danbaysay marka uu ogeysiiska racfaanka ee caymiska caafimaadka dhimirku kugusoo gaaro boostada.

Haddii aadan helin Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, waxaad gudbin kartaa Dhageysiga Gobalka markii aad doonto.

**Miyaan sii Wadan karaa Adeegyada Inta aan Sugaayo Go'aanka Dhageysiga Gobalka?**

Haddii aad hadda hesho adeegyada la ogolaaday aadna doonayso in laguu sii wado adeegyada inta aad sugayso go'aanka Dhageysiga Gobalka, waa inaad codsataa Dhageysiga Gobalka 10 maalmood gudahood laga bilaabo marka aad hesho Ogeysiiska Go'aanka Diidmada Gunnada, ama kahor taariihda caymiskaaga caafimaadka dhimirku sheego in adeegyada la joojin doono ama la yarayn doono. Marka aad codsato Dhageysiga Gobalka, waa inaad sheegtaa inaad doonayso in adeegyada laguu sii wado inta hanaanka Dhageysiga Gobalka uu socdo.

Haddii aad codsato in laguu sii wado adeegyada, go'aanka kama danbaysta ah ee Dhageysiga Gobalkuna xaqiijiyo go'aanka hoos u dhigista ama joojinta adeegga aad hesho, waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso qarashka adeegyada la baxshay inta Dhageysiga Gobalku socdo.

**Goorma ayaa go'aan Laga Gaarayaa Dhageysigayga Gobalka?**

Kadib marka aad codsato Dhageysiga Gobalka, waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood si go'aan looga gaaro kiiskaaga laguuna soo diro jawaab.

**Ma heli karaa Go'aanka Dhageysiga Gobalka oo Degdeg ah?**

Haddii aad aaminsan tahay in sugista mudadaas dheer ay khatar ku tahay caafimaadkaaga, waxaad awoodi kartaa inaad codsato in jawaabta lagugu siiyo sadex maalmood gudahood. Ka codso dhakhtarkaaga ama xirfadlaha caafimaadka dhimirka inuu kuu qoro waraaq. Sidoo kale adiga qudhaada ayaa qoran kara waraaqda. Waraaqdu waa inay sharaxdaa si faahfaahsan sida sugitaanka muddo dhan 90 maalmood si kiiskaaga go'aan looga gaaro ay khatar wayn ugu tahay noloshaada, caafimaadkaaga ama awoodaada haysashada, joogtayta, ama haysashada shaqada maskaxda ee buuxda. Kadib, xaqiiji inaad codsato "dhageysi degdeg ah" waraaqdana soo raaci codsigaaga dhageysiga.

Waaxda Adeegyada Bulshada, Laanta Dhageysiga Gobalka, ayaa akhrin doonta codsigaaga Dhageysiga Gobalka ee degdega ah kadina go'aaminaysa haddii aad u qalanto. Haddii la aqbalo codsigaaga dhageysiga degdega ah, dhageysiga ayaa la qaban doonaa, kadibna go'aanka dhageysiga ayaa lasoo saari doonaa sadex maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood laga bilaabo taariikhda ay codsigaaga heshay Laanta Dhageysiga Gobalka.

## DARDAARANKA HORE

**Waa maxay Dardaaranka Hore loo sii Qoray?**

Waxaad xaq u leedahay inaad lahaato dardaaranka hore. Dardaaranka hore waa tilmaamo qoran oo ku aadan daryeelkaaga caafimaadka kaasoo lagu aqoonsan yahay sharciga California. Waxaa ku jira xog sheegaysa sida aad doonayso in daryeelka caafimaadka laguu siiyo ama sheegaysa noocyada go'aannada aad doonayso in la gaaro, haddii ama marka aadan awoodin inaad naftaada u hadasho. Waxaad mararka qaar maqli kartaa dardaaranka hore oo lagu qeexaayo dardaaranka nool ama awooda masuuliyada joogtada ah.

Sharciga California ayaa qeexaaya dardaaranka hore inuu yahay midkood tilmaanta caafimaadka ee hadalka ah ama qoraalka ah ee gaarka ah ama awooda qareenka (dukumiinti qoran oo qofka u fasaxaysa inuu go'aano kuu gaaro). Dhammaan caymisyada caafimaadka dhimirka ayaa loo baahan yahay inay lahaadaan xeerarka dardaaranka hore. Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu ku siiyo xog qoraal ah oo ku aadan xeerarak dardaaranka hore ee caymiska caafimaadka dhimirka iyo sharaxaada sharciga gobalka, haddii lagaa codsado xog. Haddii aad doonayso inaad codsato xog, waa inaad wacdaa caymiskaaga caafimaadka dhimirka si aad u hesho xog dheeraad ah.

Dardaaranka hore ayaa loo sameeyay inuu u sahlo dadka inay maamulaan daawayntooda, gaar ahaanna marka aysan awoodin inay baxshaan amarada la xariira daryeelkooda shaqsiga ah. Waa dukumiinti sharci ah oo u sahlaysa dadka inay sheegaan, xili hore, waxa ay doonayaan in la sameeyo haddii aysan awoodin inay gaaraan go'aannada daryeelka caafimaadka si iskood ah. Tan waxaa ku jiri kara waxyaabaha sida xaqa aqbalaada ama diidista daawaynta caafimaad, qaliinka, ama inay gaaraan dookhyada kale ee daryeelka caafimaadka. Gudah California, dardaaranka hore ayaa ka kooban labo qaybood:

- Magacaabistaada wakiil (qof) gaaraaya go'aannada la xariira daryeelkaaga caafimaad; iyo
- Tilmaamahaaga gaarka ah ee daryeelka caafimaadka

Waxaad heli kartaa foomka dardaaranka hore ee aad ka helayso caymiskaaga caafimaadka dhimirka ama oonlaynka. Gudaha California, waxaad xaq u leeedahay inaad tilmaamaha dardaaranka hore siiso dhammaan dhakhaatiirta daryeelka caafimaadka. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad badesho ama joojiso dardaarankaaga hore marka aad doonto.

Haddii aad su'aalo ka qabto sharciga California ee la xariira shuruudaha dardaaranka hore, waxaad waraaq u diri kartaa:

California Department of Justice
Attn: Public Inquiry Unit,
P. O. Box 944255
Sacramento, CA 94244-2550

## XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA MACMIILKA

### Waa maxay Xaquuqdayda markaan ahay Macmiilka Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?

Marka aad tahay qof u qalma Medi-Cal, waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah oo aad ka hesho caymiska caafimaadka dhimirka. Marka la helaayo adeegyadaan, waxaad xaq u leedahay in:

- In laguula dhaqmo si qadarin leh lana ixtiraamo sharaftaada iyo sirtaada.
- Inaad hesho xog ku aadan dookhyada daawada ee la heli karo laguuguna sharxo qaab aad fahamayso.
- Inaad ka qaybgasho go'aannada la xariira daryeelkaaga caafimaadka dhimirka, uuna ku jiro xaqa aad u leedahay inaad diido daawada.
- Inaad ka caaganaato nooc kasta oo xanibaad ama jacjuubid ah oo loo adeegsado in lagugu caburiyo, lagugu edbiyo, lagu istareexo, ciqaab, ama aargoosi ah oo la xariira adeegsiga jajuubka iyo caburinta.
- Inaad codsato aadna hesho nuqulka diiwaanadaada caafimaadka, aadna codsato in la badelo ama la saxo, haddii loo baahdo.
- Inaad hesho xogta ku qoran buug-gacmeedkaan ee ku saabsan adeegyada uu daboolaayo caymiska caafimaadka dhimirka, waajibaadka kale ee caymiska caafimaadka dhimirka, iyo xuquuqdaada halkaan lagu qeexay. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad ku hesho xogtaan iyo xogta kale ee uu ku siiyay caymiska caafimaadka dhimirku qaab fudud inaad fahanto uuna waafaqsan yahay Sharciga Ameerikaanka Naafada ah. Tani waxay ka dhigan tahay, tusaale, in caymiska caafimaadka dhimirka ay qasab tahay inuu xogtiisa qoran ku diyaarsho luuqadaha ay adeegsadaan ugu yaraan shan boqolkiiba ama 3,000 kamid ah macaamiishiisa caymiska caafimaadka dhimirka, hadba kii yar, uuna adeegyada turjumaanka afka u diyaarsho si bilaash ah dadka ku hadla luuqadaha kale. Tan ayaa sidoo kale ka dhigan in caymiska caafimaadka

dhimirka ay qasab tahay inuu xog kaladuwan siiyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah, sida dadka indhoolka ah ama ragoodu daciifay, ama dadka dhibka ku qaba inay wax akhriyaan.

- Inaad hesho adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah oo uu baxsho caymiska caafimaadka dhimirka oo raacaaya heshiiska kala dhexeeya gobalka ee helitaanka adeegyada, xaqiijinta tayada iyo adeegyada ku filan, isku dubaridka iyo sii wadista daryeelka, iyo adeegyada caymiska iyo ogolaanshaha. Caymiska caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu:
  - Shaqaalaysiiyo ama uu heshiisyo qoraal ah la galo dhakhaatiir ku filan si loo xaqiijiyo in dhammaan macaamiisha u qalma Medi-cal ee u qalma adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ay heli karaan dhakhaatiirta waqtiga ay u baahdaan.
  - Inuu daboolo adeegyada caafimaad muhiimka ah ee ka baxsan shabakada caymiska ee aad hesho waqtiga ku haboon, haddii caymiska caafimaadka dhimirku uusan lahayn shaqaale ama adeeg bixiye qandaraas kula jira oo adeegyada bixin kara. "Dhakhtar ka baxsan caymiska" waxaa laga wadaa dhakhtar aan kamid ahayn liiska dhakhaatiirta caymiska caafimaadka dhimirka. Caymiska caafimaadka dhimirku waa inuu xaqiijiyaa inaadan dhiibin wax qarash dheeri ah marka aad u tagto dhakhtar ka baxsan caymiska.
  - Waa inuu xaqiijiyaa in dhakhaatiirtu u tababaran yihiin bixinta adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee dhakhaatiirtu aqbaleen inay daboolayaan.
  - Waa inuu xaqiijiyaa in adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah ee caymiska caafimaadka dhimirku daboolaayo ay ku filan yihiin cadad ahaan, mudada waqtiga, iyo xajmigaba buuxinta baahiyaha macaamiisha u qalma ee Medi-Cal. Tan waxaa ku jira xaqiijinta in nidaamka caymiska caafimaadka ee xaqiijinta qarashka adeegyada lagu saleeyo muhiimada caafimaad iyo inuu xaqiijiyo in shuruudaha muhiimada caafimaadku yihiin kuwo si cadaalad ah loo adeegsado.

- Waa inuu xaqiijiyaa in dhakhaatiirtu sameeyaan baaritaanno ku filan dadka heli kara adeegyada ayna la shaqeeyaan dadka heli doona adeegyada si loo abuuro yoolal ku aadan daaweynta iyo adeegyada kuwaasoo la siin doono.
- Waa inay siiyaan fikir labaad oo uu baxsho dhakhtar xirfad caafimaad leh kana tirsan shabakada caymiska caafimaadka dhimirka, ama mid ka baxsan caymiska, ayadoo aan lagaa qaadin wax qarash dheeri ah haddii aad codsato.
- Waa inuu isku dubaridaa adeegyada uu baxsho iyo adeegyada lagugu siiyo qorshaha daryeelka maaraysan ee Medi-Cal ama dhakhtarkaaga guud, haddii loo baahdo, uuna xaqiijiyo in sirtaada la difaaco sida ku cad xeerarka federaalka ee sirta xogta caafimaadka.
- Waa inuu ku siiyaa daryeelka waqtiga ku haboon, ayna ku jiraan inuu adeegyada baxsho 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii, marka ay caafimaad ahaan muhiim tahay si loo daaweeyo xanuunka dhimirka oo xaalad degdeg ah ama xaalad degdeg ah ama dhibaato.
- Inuu ka qaybgalo dedaallada gobalka si loo dhiiri geliyo bixinta adeegyada qaab ku haboon dhaqanka dhammaan dadka, ayna ku jiraan kuwa aan aqoonta badan u lahayn Ingiriisiga iyo kuwa leh dhaqannada iyo qoomiyadaha kaladuwan.

- Caymiskaaga caafimaadka dhimirka ayaa laga doonayaa inuu raaco sharciyada quseeya ee federaalka iyo gobalka (sida: Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah 1964 kaasoo lagu dhaqan gashay xeerarka 45 CFR farqada 80; Sharciga Takoorka Da'da oo soo baxay 1975 sida lagu dhaqan gashay xeerarka 45 CFR farqada 91; Sharciga Dhaqan Celinta ee 1973; Title IX ee Waajibaadka Waxbarashada ee 1972 (oo quseeya barnaamijyada waxbarashada iyo nashaadaadka); Title-yada II iyo III ee Sharciga Ameerikaanka Naafada ah); Qaybta 1557 ee Sharciga Difaaca Bukaanka iyo Daryeelka Qiimaha Jaban; iyo sidoo kale xuquuqaha halkaan lagu sheegay. Si kale hadan u dhahno, waa inaad heshaa daawayn, waana inaan marna laguu gaysan takoor.

- Waxaad xuquuq dheeri ah ku heli kartaa sharciyada gobalka ee la xariira daawaynta caafimaadka dhimirka. Haddii aad dooneyso inaad la xariirto Qareenka Xuquuqda Bukaanka ee degmadaada, waxaad wici kartaa midkood wakaaladaha hoose.
    - Si aad u hesho Adeegyada Bukaan Jiifka ana Hooyga, wac Adeegga U doodista Bukaanka ee JFS oo aad ka wacayso 619-282-1134 ama 1-800-479-2233.
    - Si aad u hesho Adeegyada Bukaan Socodka, ka wac CCHEA lambarka 1-877-734-3258.

**Waa maxay Waajibaadkaygu markaan ahay Macmiilka Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah?**

Marka aad tahay macmiilka adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Gaarka ah, waxaad masuul ka tahay:

- Inaad si taxadar leh u akhrido buug-gacmeedka macmiilka iyo agabka kale ee xogta muhiimka ah ee kasoo baxda caymiska caafimaadka dhimirka. Xogtaan ayaa kaa caawin doonta inaad fahanto adeegyada aad heli karto iyo sida aad ku heli karto daawayn haddii aad u baahan tahay.
- Inaad uga qaybgasho daawaynta sida la mudeeyay. Waxaad heli doontaa natiijooyinka ugu fiican haddii aad kala shaqayso dhakhtarkaaga abuurista yoolalka daawayntaada aadna raacdo yoolalkaas. Haddii aad doonayso inaad ka baaqato balan, wac dhakhtarkaaga ugu yaraan 24 saac kahor, kadibna dib u dhigo balanta maalin iyo waqti kale.
- Mar kasta soo qaado Kaarkaaga Aqoonsiga ee Medi-Cal (BIC) iyo aqoonsi sawir leh marka aad u timaado daawaynta.
- U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay turjumaanka hadalka kahor balantaada.

- U sheeg dhakhtarkaaga dhammaan walaacyadaada caafimaadka. Hadba intaad xog dhamaystiran uga sheegto dhakhtarkaaga baahiyaha aad qabto, ayay daawayntaadu sii guulaysanaysaa.
- Xaqiiji inaad waydiiso dhakhtarkaaga su'aalo kasta oo aad qabto. Aad ayay muhiim u tahay inaad si buuxda u fahanto xogta aad hesho inta lagu jiro daawayntaada.
- Raac talaabooyinka la qorsheeyay ee aad adiga iyo dhakhtarkaagu ku heshiisiin.
- La xariir caymiska caafimaadka dhimirka haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyadaada ama haddii aad dhibaatooyin ku qabto dhakhtarkaaga oo aadan awoodin inaad xal u hesho.
- U sheeg dhakhtarkaaga iyo caymiskaaga caafimaadka dhimirka haddii ay wax isbadello ah ku dhaceen xogtaada gaarka ah. Tan waxaa ku jira ciwaankaaga, lambarka taleefanka, iyo xog kasta oo caafimaad oo saamayn karta awoodaada ka qaybgalka daawaynta.
- Ula dhaqan shaqaalaha ku siinaaya daawaynta si qadarin iyo xushmad leh.
- Haddii aad ka shakido khiyaano ama khalad lagu kacaayo, u soo sheeg:
  - Waaxda Adeegyada Caafimaadka ayaa ka codsanaysa in qof kasta oo ka shakiya khiyaano, khasaaro, ama xadgudub ka dhacaaya Medi-Cal uu soo waco Laynka Kahortaga Khiyaannada ee DHCS Medi-Cal oo ah **1-800-822-6222**. Haddii aad dareento in arintaani xaalad degdeg ah tahay, fadlan wac **911** si laguu siiyo caawimaad degdeg ah. Wicitaanku waa lacag la'aan, qofka soo wacaaya ayaana qarin kara magaciisa.
  - Waxaad sidoo kale khiyaano ama xadgudub aad ka shakiday iimeelka ugu diri kartaa fraud@dhcs.ca.gov ama waxaad adeegsan kartaa foomka oonlaynka ah oo ah http://www.dhcs.ca.gov/individuals/Pages/StopMedi-CalFraud.aspx.